

# BARO GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS

DIIRADDA

ICRC

**Sawirka buugga wato: Mid ka mid ah adeegyada muhimka ah ee ICRC-du u fidiso dadka saameysay dhibaato waa in ay ku caawiyaan sidii dib ula xiriirin lahaayeen xubnaha qoyska.**

**Halkaaan Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ah ee Koongo gabar yar ayaa dib loola kulansiiyey abtigeed. Waxay qoyskeeda ka luntay markii dagaalka dilaacay 2009kii.**

# BARO GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS




Marçal Izard/ICRC

Maxaa ICRC loogu baahan yahay? .......... 4
Maxay tahay ICRC? .......... 6
*Sheeko ICRC lagu baran karo: xal-raadis* .......... *8*
Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Ururada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas .......... 10
Halkee bay ICRC-du ka hawl-gashaa? .......... 12
*Sheeko ICRC lagu baran karo: Kariima iyo xirfaddeeda* .......... *14*
Annagu yaan nahay? .......... 15
Gargaar .......... 16
Amniga dhaqaalaha .......... 18
Biyo iyo degaan dabiici ah .......... 20
Daryeel caafimaad .......... 22
Dhul-ku-aasidda walxaha qarxa .......... 24
*Sheeko ICRC lagu baran karo: Holmes oo mar kale lugihiisa isku taagey* .......... *26*
Dhawritaan .......... 29
Goobjoognimo iyo wada-hadal .......... 30
Wacyi-gelinta xagga dhawrista maxaabiista .......... 32
Dhawrista dadka nugul .......... 34
*Sheeko ICRC lagu baran karo : Gargaarka degdegga ah ka sokoow* .......... *36*
Dib u soo-celinta xiriirka qoysaska kala lumay .......... 38
*Sheeko ICRC lagu baran karo: Maxbuus hore oo jawaabo helay* .......... *39*
Ka-hortag .......... 40
Farriin-garsiinta khadka hore ee dagaalka .......... 42
Higsiga mustaqbal midka maanta ka Aadminnimo roon .......... 44
Xadeynta khasaaraha aadanaha dagaalka .......... 46
Daryeelka Caafimaadka oo halis ku jira .......... 48
Ogaanshaha mustaqbalka .......... 50

Meelaha daryeelka caafimaadka magac ahaan aanu jirin sababta oo ah colaada, shaqaalaha ICRC waxay adeegsadaan siyaabo kasta oo ay ku gaari karaan dadka. Halkaan Saocrus wuxuu si xawaare ah doon ku wada Webiga Guaviare oo ku yaalo Kolombiya.

# MAXAA ICRC LOOGU BAAHAN YAHAY?

Ilaa iyo inta dadka ay dagaal raaci doonaan si ay u xaliyaan khilaafaadkooda, way jireysaa baahi loo qabo ururro madax bannaan ah sida Hay'adda Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas, si loo gargaaro dadweynaha rabshada wax ku noqda.

Nasiibdarro, baahidaasi weligeed sidii ay u weyneyd ayay maantana u weyn tahay. Colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan calami ahayn labaduba waxay u kala jarayaan bulshooyinka iyo dalal idil oo dunida ku wada baahsan. Maalinba maalinta ka dambaysa, maadaama tirada dadweynaha uu ku soo kordhay magaalooyinka, dagaalladu inta badan waxay ka dhacaan waddooyinka iyo isla meelaha ay dadku ku nool yihiin, kana shaqeeyaan.

Isla markaas, waxaa jira noocyo kale oo gacan-ka-hadal ah - kuwa u dhexeeyo shabakadaha dembiyada culculus, kooxo mooryaan ah iyo ciidammada booliiska, iyo kooxaha qabiil ahaan u habaysan - oo dhib iyo rafaad ka sii wayn keenayo.




Waqtiyada lagu jiro colaada, caafimaadka dadka wuu sii xumaan karaa. Tani waxay gaar ku tahay caruurta. Si aan ka jawaabno baahidaas, waxaan siinnaa adeegyo caafimaad sida qoyska halkaan lagu sawiray oo ka soo cararay rabshadaha Ciraaq.



Giuseppe Allegri/ICRC

**ICRC waxaa la asaasay 150 sano ka hor ka dib dagaalkii magaalada Solferiino 1859kii.**

## Khasaare ballaaran

Dhammaan xaaladahaas aan soo xusnay, mar walba dad aan dagaalka lug ku lahayn ayaa si aan kala-sooc lahayn loogu dilaa, amaba si kas ah loo bar-tilmaameedsadaa. Sidoo kalena, dad aad u faro badan ayaa lagu dirqiyaa inay guryahooda ka cararaan, kana qaxaan iyaga oo aan haysan cunno, biyo iyo hooy toona. Isla markaasna waxaa la is su'aalayaa hadii shuruucdii hore ee dagaalka ay nagu filan yihiin ama hadii loo baahan yahay in wax lagu kordhiyo, sababta oo ah waxyaabo cusub ayaa soo baxay, sida hub meel fog laga hago iyo mid roobootka maamulo, ama soo-ifbaxa dagaallada internetka, amaba badashada colaadaha u dhexeeya kooxo hubaysan ee aan dawlad dhinac ka ahayn.

## Xeerka dagaalka

Shuruucda ku saabsan tabta dagaalka loo qaado iyo cidda ay tahay in la ilaaliyo waxaa la isugu geeyey xirmo shuruuc ah oo inta badan lagu saleeyey Heshiisyadii Jineefa (Geneva), waxaana loogu yeeraa xeerka dagaalka ama Xeerka Caalamiga ah ee Aadaminnimo. Shuruucdaan oo waxyaabo kalena ay ka mid yihiin waxaa ku jira dhawr Axdi oo xadeynaya adeegsiga xoogga, mamnuucaaya qaar hubka ka mid ah, isla markaasna ilaalinaaya dadka rayadka ah, maxaabiista dagaalka, kuwa dhaawaca ah, kuwa xanuunsan iyo xubnaha Ciidammada Qalabka Sida ee maraakiibtu ay badaha kula jabto. Iyada oo la tix-gelinaayo dabeecadaha ka soo if-baxaaya colaadaha qarnigaan 21d, ICRC waxay ku sii dedaali doontaa inay bixiso kaalmo wax-ku-ool ah iyo dhawritaan. Waxaan kaloo kaalinta ugu weyn ka cayaari doonnaa soo-if-bixinta Xeerka Aadaminnimada iyo caddaynta, horumarinta iyo xoojinta shuruucdaan xirmada ah, si looga jawaabo xaqiiqooyinka ay dirirta casriga ahi la soo baxday.

## Baahida soo baxaya

ICRC waxay si joogto ah u raadisaa habab waxtar leh oo wax lagaga qabanaayo dhibaatooyinka manta ee murugsan, isla markaasna taddaawuraan. Taasna waxaa tusaale u noqon kara xaaladda adag ee qaxootiga adduun-weynuhu ay ku sugan yihiin. Maalin kasta dad tiradoodu ay sii kordheyso ayaa dhulkii ay ku dhasheen ka huleelaaya, iyaga oo baad-goob ugu jira cunno, shaqo iyo kob ammaan ah oo ay ku noolaadaan. Inta horumarinta noloshooda ay dadkaasi u xusul-duubayaan, waxay u bareeraan halis natiijooyin naxdin weyn leh ay kala kulmaan. Sidaas darted, waxaan sii raadin doonnaa habab cusub oo lagu taageeraayo qaxootiga, waxna lagaga qabanaayo baahiyaha kale ee waaweyn.

# MAXAY TAHAY ICRC?

ICRC waa hay'ad hawlo Aadaminnimo u go'an oo dhexdhexaad ah, cidna aan u eexan, isla markaasna madax-bannaan. Waxaan awood u haysannaa in aan kaalmayno oo dhawrno dadka ay saamayso colaadda hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kale ama xaaladaha kale ee gacan-ka-hadalka, sida uu tilmaamayo bayaanka shaqadeena. Oraahda ah «gacan-ka-hadal» ama «xaaladaha kale ee gacan-ka-hadalka» waxaan ula jeednaa gacan-ka-hadalka aan gaarin colaad hubaysan, laakiinse ay kooxo tiro badani ku lug leeyihiin, dhibaato xagga aadaminnimada ahna sabab u noqda. Awooddaan waxaa na siiyey Dawlado, waxayna ku jirtaa, laguna sharciyeeyey afarta Axdiyad ee Janeefa ee 1949kii, Baratakoolladooda Dheeraadka ah ee 1977kii iyo 2005tii, iyo Xeerka Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ee 1986dii.

Waajibaadkeena iyo xaaladdeena sharci ahaan ayaa naga soocaaya hay'adaha kale oo dhawr xukuumad ka kooban (sida hay'adaha takhasuska leh ee Qaramada Midoobay) iyo, sidoo kale, ururrada aan Dawliga ahayn. Xaaladda sidaan ahi waxay noo oggolaanaysaa inaan hawlaheena gudanno, annaga oo ka madax bannaan xukuumadaha iyo inaan dhexdhexaadnimo buuxda ugu adeegno dadka kaalmo iyo dhawris u baahan.




Maxim Dondyuk/ICRC

# WAXA AAN QABANNO

Hawlaha ICRC waxay diiraddu u saaran tahay ilaalinta nolosha, caafimaadka iyo sharafta dadka gacan-ka-hadalku uu sida xun u saameeyo. Hawlaha sidaas ah marka ay qabanayso, waxay ICRC adeegsataa hab dhammaystiran, isla markaasna midaysan, si saddexda shaqo oo kala duwan oo haddana sida aadka isugu xiran ay isku mar uga soo dhalaasho; kuwaas oo kala ah dhawrista, kaalmaynta iyo ka-hortagga. Mid kasta oo saddexdaas laga fuliyaaba, waxay war-gelin, xoojin iyo wax-ku-biirinba u tahay shaqooyinka ay labada kale qabanayaan.

## Gargaar

Waxaan kaalmaynaa dadka colaadaha hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kale ay sida xun u saameeyaan annaga oo biyo iyo hooy siinna; baahidooda dhaqaale kobcinna; daryeelka caafimaadkooda hagaajinna (taasi oo ka mid ah qalliinka dagaallada iyo daryeelka la-haysteyaasha); hubinna in si habboon meydadka loo maamulo, loona aqoonsado; caawinna dhibbaneyaasha miinooyinka wax ku noqda iyo hubka aan weli qarxin. Fiiri bogga 16aad.

## Dhawris

ICRC waxay ku dedaashaa sidii ay u badbaadin lahayd nolosha, fayoobida iyo sharafta dadka rayadka ah ee wax ku noqda colaadda hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kale, kuwaas oo maxaabbiistuna ay ku jiraan. Hawlahaasna waxaan ku fulinnaa annaga oo madaxda xukuumadaha iyo kooxaha kaleba ku dhiirri-gelinna inay qaataan masuuliyadaha ka saaran fulinta Xeerka Caalamiga ah ee Aadaminnimo iyo shuruucda kale ee ilaalinaya dadyowga uu gacan-ka-hadalku saameeyo. Fiiri bogga 28aad.

## Ka-hortag

Waxay ICRC qaaddaa tallaabooyin isugu jira heer caalami, mid goboleed iyo mid maxalli ah intaba, si ay dadka uga dhaadhiciso ku-dhaqmidda Xeerka Caalamiga ah ee Aadaminnimo iyo mabaadi'da aadaminnimo. Waxaan isku hawlnaa si aan kor ugu qaadi lahayn wacyiga laga haysto arrimaha waaweyn ee aadami ahaan laga walaaci karo. Fiiri bogga 40aad.

**Shaqadeena inteeda badan, waxaan iskaashi dhow kala yeelannaa Ururrada Maxalliga ee Laanqayrta Cas iyo kuwa Bisha Cas iyo ururrada waaweyn ee u dhaqdhaqaaqa hawlaha Aadminnimada ku saabsan.**
**Faahfaahin dheeraad ah u raadso: www.icrc.org/discover.**

**Waqtiyada dhibaatada jirto ICRC waxay qabataa wax kasta oo ay awooddo si ay dadka ugu caawinto in ay daboolaan baahiyahooda maalmeed. Gudaha Ukraine dadka deegaanka oo rootiga duba waxaan siinnay bur (daqiiq) si ay ugu sameeyaan rooti. Anagoo la shaqeyneyna Laanqeyrta Cas ee Ukrain waxaa dadka dagaalada barakiciyey siinnay rooti.**

*SHEEKO ICRC LAGU BARAN KARO:*

# XAL-RAADIS

Injinneer Khaalid Mushaara oo biyaha iyo degaanka ku takhasusay ayaa wuxuu in badan isku hawlay inuu horumariyo nolosha muwaaddiniinta dalka Yaman ee uu ka midka yahay. Ka hor 2012kii intii uu san ICRC ku biirin, wuxuu u shaqayn jirey hay'ad horumarineed oo ka shaqaysa dib-u-dhiska waddooyinka dalkaas. Wuxuu xusuustaa in markii ugu horreysey ee uu ICRC maqlay uu xoogaa ka shakiyey hay'addaas dalka Iswiiska laga leeyahay iyo macatabka guduudan ee ah astaanta u gaarka ah.

Wuxuu weli xusuustaa markiisii hore inuu isweydiin jirey: "'Toloow, ICRC maxay qabataa? Ma dhab baa arrimo Aadminnimo inay ka shaqayso, mase waxay halkan u joogaan, iskuna deyayaan in dadka diintooda ay ka baddalaan. Hase ahaatee, markaan si wacan ugu fiirsaday, isla markaasna intaan baaray wixii ay ICRC u taagan tahay ayaan ogaadey inay tahay wax kale oo ka duwan wixii aan ka aamminsanaa".

Sida Khaalid leeyahay, wuxuu ogaadey ICRC inay tahay hay'ad kaalmayso dadka ugu nugul, iyadoon eegin isirkooda, caqiidadooda iyo diintooda midna. Wuxuu Khaalid intaas raaciyey: "Siday ICRC u aragto, haddiiba aad banii'aadan tahay, waxaad mudan tahay inaad noolaato. Wuxuu ahaa isbaddel weyn oo ku dhacay fakerkii aan ICRC ka haysan jirey"

Tan iyo waagaas, wuxuu Khaalid arkay sidii mabaadi'da dherxdhexaadnimada iyo eexasho la'aanta ee aan ku shaqayno ay awood na siiyaan inaan gaarno meelaha ay ku sugan yihiin dadka si toos ah ay dirirtu saamayso. Wuxuu yiri: "Taasina waxay ku suurowdey dhammaan kooxaha iska soo hor-jeeda oo ku kalsoon dhexdhexaadnimada ICRC iyo dhinacyada is-haya inaysan, marnaba, u kala hiilin. Sidaas awgeed, annagu waxaan ka hawl-geli karnaa dhul aan inta kale ka hawl-geli karin."

## Sheekooyin kale oo ICRC lagu baran karo

Kaasi wuxuu ahaa hal tusaale oo ku saabsan sida dadka adduun-weynaha ku kala nool ay u barteen ICRCdu waxa ay tahay. Waxay kaloo muujinaysaa hawl-wadeennada uu Khaalid ka mid yahay siday ula shaqeeyso bulshooyinka maxalliga ah, si ay u helaan habab cusub oo danteena asaasiga ah aan ku fulin karnaa – yareeynta dhibaatooyinka uu dagaalka sababo. Waxaad buuggaan yar ka baran doontaa ICRC iyada oo la adeegsanaayo sheekooyin dadka ku saabsan sida Khaalid iyo sharraxaadyo gaaggaaban oo lagu macnaynayo waxa, dhabtii, ay ICRC tahay, waxa aan qabanno, sida aan u qabanno, goorta aan qabanno, halka aan ka qabanno iyo sababta aan tallaabo u qaadno.

**Faahfaahin dheeraad ah u doono www.icrc.org/discover**

*"Mashaariicdu waa in ay noqdaan kuwo waara. Habkaan shaqo ayaa niyaddeyda ka dhaliyay in aan ixtiraamo ICRCda. Muhiimad weyn ayey noo leedahay in aan qabanno mashaariic muddo dheer dadka caawinaya."*

Enjineerka Biyaha iyo Deegaanka Khaled Mushara


ICRC

**Khaaled Mushara wuxuu ka shaqaynayaa in bulshooyinka deegankas uu siiyo tubooyin iyo haaman biyo, wuxuu kale qotomiyaa meelo ku meel gar ah oo laga dhaansado biyaha, wuxuuna diyaactiraa uuna kor u qaadaa tayada isbitaallada, wuxuu nidaamiyaa korontada iyo waraabka beeraha oo dagaalka waxyeelay.**

# DHAQDHAQAAQA CAA LAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

ICRC waxay qayb ka tahay Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, kaas oo ka kooban 189 Ururo Qarameed ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas iyo, sidoo kale, Xiriirka Caalmiga ah ee Ururada Bisha Cas iyo Laanqayrta Cas. Ururada Qarameed waxay ka hawl-galaan gudaha dalalka ay ka kala tirsan yihiin, halka Xiriirka wuxuu isku dubbe-ridaa jawaabta caalamiga ee  Ururada Qarameed markii ay dhacaan masiibooyin oo ka baxsan dagaallo hubeysan. Dhinacyada ay ICRC wada shaqeeyaan, Xiriirka waa shariigga ugu muhiimsan ee ICRCda, gaar ahaan markii colaadaha hubaysan iyo masiibooyinka ay isku labmaan. Waxaan haddana si dhab ah ula shaqaynaa Ururdad Qarameedka, iyagoo nala wadaagaan aqoontooda farsamo, aqoontooda waaqiciga ah ee dhulka ay deggan yihiin iyo dhaqammada iyo afafka maxalliga ah.

## URURADA QARAMEED EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

Ururada Qarameed waxay xukuumadaha dalalka ay ka kala tirsan yihiin ka kaalmeeyaan siday hawlaha aadminnimada u gudan lahaayeen. Waxay bixiyaan adeegyo ballaaran oo ay ka mid yihiin gargaar musiibo, barnaamijyo caafimaad iyo kuwo bulsho intaba. Xilliga dagaalka, Ururada Qarameed waxay kaalmo u fidiyaan dadka rayadka ah, halkii ay ka suuroobi kartana waxay taageeraan adeegyada caafimaadka ee ciidanka.

## XIRIIRKA CAALAMIGA AH EE URURADA QARAMEED EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

Xiriirku wuxuu ka kooban yahay 189 Ururo Qarameed ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas kuwaas oo wadajirkooda lagu tilmaami karo shabakada dunida ee hawlaha Aadminnimo ugu baaxadda weyn. Si uu, haddaba, wax uga qabto, nolosha dadka jilicsanna uu u hagaajiyo, wuxuu Xiriirku hawl-galaa guuldarrooyinka iyo dhibaatooyinka caafimaadku ka hor inta aanay dhicin, inta ay socdaan iyo ka dib markii ay dhacaanba; taasna wuxuu ku xaqiijiyaa adeegyo waqtiga fog ah, barnaamijyo horumarineed, talooyin ku salaysan ka-jawaabidda masiibooyinka iyo, sidoo kale, ka-soo-kabashada dhibaatooyinka.

ICRC, Xiriirka iyo Urur Qarameed kasta way wada madax-bannaan yihiin. Mid kastana waxay leedahay xeerkeeda gooni ah, midna ka ma sarreyso midda kale.

Hawsheena waxaa goor walba haga Mabaadi'da Asaasiga ah ee u qoran Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

## MABAADI'DA ASAASIGA AH

### Insaanimo

Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas oo markoodii horeba ka dhashay u baahnaansho ku saabsan kaalmo aan kala-sooc lahayn oo loo fidiyo dadka goobaha dagaalka ku dhaawacma, wuxuuna, markii la eego awooddisa caalami iyo qaranba, isku dayaa sidii uu u hor-joogsan lahaa, una yasiri lahaa dhibaatada Aadmiga soo gaadha, meel kastaba ha ka jirtee. Hadafkiisu waa inuu ilaaliyo nolosha iyo caafimaadka qofka, hubiyana ixtiraamka aadanaha. Wuxuu Dhaqdhaqaaqu dadka ka dhaadhiciyaa wanaagga ku sugan isfahamka dhinacyada, saaxiibnimada, iskaashiga iyo nabad-ku-wada-noolaansho dhex-marta dadyowga dhammaantood.

### Eex la'aan

Dhaqdhaqaaqu dadka marnaba kuma takooro dhalashadooda, isirkooda, caqiidada diineed ee ay rumaysan yihiin, dabaqaddooda ama aragtidooda siyaasadeed. Wuxuu ku dedaalaa siduu u yarayn lahaa saxariirka dadka la la kulmaya, iyada oo loo yeelaayo keliya baahida ay qabaan, isla markaasna la horraysiinaayo xaaladaha guuldarrooyinka ugu degdegsan.

### Dhexdhexaadnimo

Si uu ugu sii naalloodo kalsoonida loo wada hayo, Dhaqdhaqaaqa uma bannaana dhinacyada ay colaaduhu ka dhexeeyaan inuu middood la safto amaba uu ka qayb-qaato muramo kasta oo leh dabeecad siyaasadeed, midi isir, mid diineed ama tu' aydhiyoolojiyad cuskan intaba.

### Madaxbannaani

Dhaqdhaqaaqu waa madax-bannaan yahay. In kastoo ay xukuumadahooda garbo u yihiin dhinaca adeegyada Aadminnimada, xeerarka dalalkooda u dhiganna ay qabtaan, haddana Ururada Qarameedka waa inay, maamul ahaan, mar walba madax-bannaanaadaan, si had iyo jeer ay ugu shaqeeyaan si waafaqsan mabaadi'da Dhaqdhaqaaqa.

### Adeeg mutadawacnimo

Waa Dhaqdhaqaaq si mutadawacnimo ah dadyowga dhibaataysan ugu gargaara oo, hab ay noqotaba, aan wax-qabadkiisa faa'iido ka dooneyn.

### Midnimo

Dal walba waxaa ka jiri kara hal Urur Laanqayrta Cas ah ama mid Bisha Cas ah oo keliya, waana qasab in ay u furnaato cid walba. Hawlaheeda Aadminnimo waa inay ka fulisaa qaybaha dalka oo idil.

### Caalaminnimo

Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas adduun-weynaha ayay ka wada jiraan; iyada oo Ururada oo dhammi ay isku meekhaan yihiin. Waxay wadaagaan masuuliyado siman iyo waajibaad ku saabsan is-kaalmeysi

**Faahfaahin siyaado ah u doono www.icrc.org/discover**

# HALKEE BAY ICRCdu KA HAWL-GASHAA?

Mar walba oo dagaal qarxoba, dadka uu gacan-ka-hadalku saameeyaa waxay u baahan yihiin gargaar degdeg ah. Sababtaas darted, ICRC si joogto ah ayey ka waddaa hawlaheeda melaha colaadaha hubaysan iyo gacan-ka-hadal ay ka jiraan, waxayna xafiisyo iyo ergooyin ku leedahay caasimadaha iyo magaalooyinka waaweynka oo muhiim ah gobol ahaan, si ay isudubbariddo  hawlaha iyo qaybinta gargaarka.

Dalal 80 gaaraya oo dunida ku kala baahsan ayaa ergooyin noo joogaan. Inta badan, shaqaalaheena oo 14000 kor u dhaafaya ayaa waxay u kala dhasheen, muwaaddiniinna ka yihiin dalalka ay ka hawlgalaan.

Xarunteena dhexe ee ku taala Janeefa (Geneva), Switzerland, ku dhowaad 900 shaqaale ayaa jaan-gooya oona fuliya qorshe hawleed iyo istaraatijiyad ee hay'adda oo dhan, waxayna



Jonathan Torgovnik/ICRC



**Khariiradaan waxaa loogu talagaly in laga helo macluumaad keliya ma laha muhiimad siyaasadeed. Wuxuu ansax ahaanaya laga bilaabo Janaayo 2015.**


**Gudaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Koongo shaqaalaha ICRC-da iyo mutadawiciinta maxaliga ah ee Laanqeyrta Cas waxay adeegsadaan dooman si ay u gaaraan dadka waxyeeleen rabshadaha.**

kale bixiyaan taageero muhiim ah, wayna kormeeraan hawlaha aan ka wadno goobaha aan joogno.

Ergooyinkeena goobtu hal dal oo keliya ayay u xil-saarnaan kara, haddiise ay yihiin ergooyin-goboleed, dhawr dal ayay u xil-saarnaan karaan. Ergooyinka waxay fuliyaan shaqooyin kala duwan oo, kolba, ku xiran xaaladda iyo baahiyaha taagan, waxaana ka mid ah:

- kaalmo maaddi ah oo la siiyo dadyowga ay saameeyaan coladaha hubeysan markaas socda ama bilawga ah ama gacan-ka-hadal kaleba wax ku noqda, waxay ku dedaalaan hubinta dhawrista dadyowgaas iyo;
- tallabo ka-hortag ah, wada shaqaynta Xiriirka iyo Ururada Qarameed iyo 'dibloomasiyadda bini'aadannimo' (iyadoo la adeegsanaaya saamaynta aan ku leennahay Dawladaha iyo dhinacyada kale, si aan wax-qabadkeena u sii horumarinno).

Ergooyinkeena waxay kale yihiin hab digniinta ugu horayso si ay u suurto-galiyaan jawaab degdeg oo miradhal ah markii colaad hubaysan ama gacan-ka-hadal kale uu meel ka qarxo.





Nick Danziger/ICRC

*SHEEKO ICRC LAGU BARAN KARO:*

# KARIIMA IYO XIRFADDEEDA CUSUB

Waxay Kariima jirtey 12 sano oo keliya (kor eeg) markii iyada iyo walaalkeed ay is'arkeen iyaga oo bartanka ugu jira xabbado la isweydaarsanaayo oo ka dhacaaya gurigooda meel u dhow, magaalada Kaabul, ee waddanka Afgaanistan. Afar xabbadood ayaa lugta kaga dhacday, taas oo qasab ka dhigtay in laga gooyo meel jilibka ka yare korraysa. Waqtigaas, Kariima waxay ICRCdu u ahayd fursad inay mar kale lugaheeda ku socoto. Ugu dambaystii, waxaa u soo baxay nolol iyo meherad cusub oo ay yeelatay. Waxay tiri: "Markaygii hore, xarunta dhaqan-celinta naafada ee ICRC waxaan u imid inaan ka helo qalabka lagu socdo, isla markaasna aan ka barto sida loogu socdo. Hase ahaate, kol dambe oo aan ugu noqday in qalabkaas la ii hagaajiyo ayaan ogaadey xaruntu inay doondooneyso shaqaale Qof ku takhasuusay jimicsiga xubnaha naafoobay."

Hadda oo labaatan sano laga jogo markii ay lugtu ka go'day, Kariima waa qof ku takhasuusay jimicsiga xubnaha naafoobay, waxayna gacan ka geysataa habsami-u-socodka hawlaha xarunta ee Kaabul. Waayeelka iyo dhallinyaradaba waxay ka kaalmaysaa siday naafannimada ula qabsan lahayeen, qalabka kolba la siiyo ay u adeegsan lahaayeen, xubnaha ay ka dhaawacan yihiinna ay ugu adkaan lahaayeen.



Shaqaale badan oo ka tirsan ICRC waxay noqdeen kuwa ugu horreeya ee la kulma cawaaqibka colaada. Kariima (bidix) nafteeda waxay ka go'day lug waxayna fahmeysaa dhibka ay marayaan bukaanadeeda.

# ANNAGU YAANNU NAHAY?

Waxaa daafaha dunida ka hawl-gala dad ka badan 11.500, kuwaas oo, sida Kariima, ICRCda dalalkooda uga shaqeeya. Xubnaha shaqaalahaan qiimaha weyn leh ayaa meel-mariya shaqada inta ugu badan taas oo ay kaga qayb-qaataan gudaha degaammadooda aqoonta ay u leeyihiin. Waddan-hebel gudihiisa shaqaalaha laga qoro ayaa haddana ergooyin dalal kale loo baddelaa. Maantadaan la joogo, waxaa noo qoran shaqaale qurbajoog ah oo 1,800 kor u dhaafaaya, goobaha shaqadana ku sugan. Barkood waa ergooyin, waa rag iyo dumarba oo maxaabbiista booqashada ugu taga, mashaariicda kaalmada ah kuwa qorsheeya oo meel-mariya, kuwa faafiya aqoonta xeerka Caalamiga ah ee Aadminnimo iyo ku-dhaqankiisaba. Inta kale, waa qaar takhasus leh sida takhaatiir, kalkaaliyeyaal, injineerro, aqoonyahanno xagga teknoloojiyada macluumaadka, takhaatiir-xoolaad, beero-yaqaanno, turjubaanno iyo maamuleyaal.

**Si shaqaalahayna aad uga ogaato iyo warar dheeraad ah oo fursadaha shaqaalayntuna ay ku jiraan, arag: www.icrc.org/discover**

# GARGAAR

## Bedbaadinta naftu, iyo ilaalinta mustaqbalka

Meeshii ay colaadi ka qaraxdaba, ICRCdu waxay u kacdaa sidii ay ku bedbaadin lahayd dadka noloshooda iyo waxa ay ku nool yihiin. Waxaan daboolnaa baahiyaha degdegga ah ee lamahuraanka u ah noloshooda, isla markaasna waxaan hubinnaa dhibaatooyinka sida caadiga ah colaadda ula socdaa in aysan wiiqin sii-jiritaankooda ama mustaqbalkooda sida cudurka, dhaawaca, gaajada, dakhli la'aanta iyo xoogagga dabeecadda (roob, dabayl, iwm).

## Gargaar darfo ballaaran

Kaalmadaynu siyaalo kala duwan ayay ku timaaddaa, iyada oo ku xiran gobolka la joogo iyo dabeecadda dhibka dhacay uu leeyahay. Waxay noqon kartaa kaalmo la taaban karo (cunto, lacag caddaan ah, abuur, qalab farsamo iyo daawo), dib-u-hagaajinta hannaanka biyo-gelinta iyo sifayntooda ama dhisidda rugo dadka lagu daweeyo. Waxaan, sidoo kale, tababbar siinnaa shaqaalaha daryeelka caafimaadka degdegga ah, kuwa qalliinka, kuwa bukaanka suuxiya, kalkaaliyeyaasha iyo farsamo-yaqaannada qalabka ay naafadu isticmaasho. Dadaalkeena oo idili wuxuu ku jeedaa xoojinta awoodda hay'adaha maxalliga ah, si adeegyada muhiimka ah ay u bixiyaan sida biyaha, fayo-dhawrka iyo daryeelka caafimaadka.

## Isdaryeel

In kastoo kaalmada degdegga ahi ay bedbaadiso nolosha dadka qaarkiis, isla markaasna khafiifiso saamaynta hore ee colaadda ayaa haddana waxay diiraddu noo saaran tahay hadafkeena ugu dambeeya oo ah inay mar kale dadku awoodaan inay iskood wax u qabsadaan. Xaaladaha qaarkood, kaalmadu waxay noqotaa lacag yar oo caddaan ah oo la bixiyo si qoysasku ay iyagu u doortaan baahiyaha ay qabaan kuwa ugu daran ee ay ku daboolaan. Waxaa kaloo, si aan toos ahayn, lacagtaas uga faa'ideysta suuqyada maxalliga ah iyo dadka wax soo saaro. Marar kale waxaan dadka ka kaalmaynaa bilaabista ganacsiyo yaryar ama siday cunnadooda ku soo saaran lahaayeen.

**Gabar biyo xamaalaysp xero qaxooti oo ku taalo Koofurta Suudaan.**



Alessio Romenzi/ICRC




Olivier Mattys/ICRC

**Ninkan oo ku sugan gobolka Pattani ee Thailand wuxuu helay doon yar iyo qalab kalluumeysi si uu kalluumayste ahaan dib u dhiso noloshiisa ka dib markii uu ka soo baxay xabsi.**

# HUBAAL DHAQAALE

Colaad hubaysan ama gacan-ka-hadal kale meeshii ay ka qarxaanba, ICRCdu waxay dadka ka gargaartaa baahiyahooda asaasiga ah sida cuntada, alaabta wax lagu karsado, hooyga, dharka, alaabta fayo-dhawrka iyo wixii la mid ah. Kolka aanu hawshaan qabanayna, waxaan maanka ku haynaa dhammaan dalabaadka dhaqaale ee asaasiga ah oo qoys u baahnaan karo.

## Baahiyaha mustaqbalka fog

Hase ahaatee, intaas kuma ekaanno. Waxaan kaloo tixgelinnaa qoysas iyo bulshooyin idili sidii, dhaqaale ahaan, ay mar kale isugu fillaan lahaayeen. Dantaynu waxay tahay inaan dadka gaarsiinno heer ay iskood wax u qabsan karaan iyadoo mustaqbalka fog indhaha lagu hayo. Maadaama ay waajibaadkeena ku jiraan dadka xoryadooda laga qaaday coladaha dartooda, waxaan kale isku daynaa in aan daboolno baahiyada nafaqo iyo kuwa fayo-dhawrka ee maxabiista meel walba oo taasi lagamaarmaan ka tahay.

Warar dheeraad ah u doono, www.icrc.org/discover



Drina Mrazikova/ICRC

**Kasamansh, Senegaal waa hal meel oo ICRC ay ku taageertay mashaariic ayna bixisay abuur iyo qalab si dadka loogu caawiyo in ay bilaabaan beero yar yar iyo ganacsiga xoolaha.**

Hawsha hubaalka dhaqaalaha ee ICRCda waxaa ku jira cunto-qaybinta, bixinta tallaallada xoolaha, dayac-tirka hannaanka waraabka beeraha, bixinta abuurka iyo qalabka, si dadka looga caawiyo wax-beerashada. Waxaa kaloo ku jira barnaamijyada shaqo-lacag-ku-baddelashada iyo xoogaa caddaan ah oo bilaash loo bixiyo, ganacsi yaryarna lagu bilaabi karo (sida saaloonka timaha lagu hagaajiyo ama garaashyada baabuurta iyo baaskiillada lagu dayac-tiro).

Cabdul Majiid wuxuu subax kasta soo toosi jiray aroortii hore si uu u tago guri guri asagoo shaqo ka raadsanaaya. “Dadka intooda badan ma doonaynin in ay shaqaaleystaan 43-jir,” ayuu yiri. “Waxaan leeyahay saddex carruur, waqtiguna wuxuu ahaa mid adag oo aan awoodin in aan shaqo helo.” Laakiin dhammaantood waa ay isbedeleen ka dib markii uu helay deeq lacageed oo qayb ka ah barnaamijka sugnaanta dhaqaalaha oo lagu caawiyo dadka ku nool koonfur-bari ee Bangladesh si ay u noqdaan kuwo isku filan.

Iyadoo loo maraayo barnaamijka, ICRC iyo Bisha Cas ee Bangladesh waxay bixiyaan tababar iyo talo iyadoo ay u dheer tahay deeqaha lacagta caddaanka ah oo lagu hormariyo beeraha, xoolaha iyo bilowga hore ee ganacsiga yar yar. “Hadda carruurtayda waxaan u diri karaa dugsiga,” ayuu yiri Mudane Majiid. “Riyadeyda si aanan fileyn ayey u rumowdey.”



Dhiman Tripura/Bangladesh Red Crescent Society




# BIYAHA IYO DEGAANKA

## Habka caafimaadka dadweynaha

Barnaamijyadeena ku saabsan biyaha iyo degaanka waxay dhammaan ku jihaysan yihiin caafimaadka guud marka ay colaaduhu aloosan yihiin; annaga oo danaynayna inaan hubinno degaan, caafimaad ahaan, lagu noolaan karo. Waxaan ku dedaalnaa inaan damaanad-qaadno in adeegyada bulshada ee muhiimka ah ay si wanaagsan u shaqaynayaan, si loo helo biyo nadiif ah, hooy, fayo-dhawr wacan, iwm.

Saamaynta colaadda hubaysani waxay noqon kartaa mid toos ah iyo mid gurrac ah, natiijada ka dhalatana  waxay ahaan kartaa muddo gaaban jirta iyo mid waqtigeedu dheer yahay. Gaar ahaanse, meelaha ugu nuguli waa magaalooyinka, halkaas oo uu dadku aad ugu badan yahay, kaabeyaasheeduna waa wax dhib badan.




## Adeegyo liita waa caafimaad liita

Haddii hababka biyaha, korontada iyo nadaafaddu aanay si wacan u shaqaynayn, dadka isticmaala caafimaadkooda ayaa ku xumaada, xaaladaha noloshuna hoos bay u dhacaan. Waxaa suuraggal ah adeegyadaas in barakacayaashu ay ka bataan ama dayac-tirkoodu uu suuraggal noqon waayo marka uu dagaalku hor-joogsado sidii loo keensan lahaa qalabkii dib loogu hagaajin lahaa.

## Adeegyo isku-xiran ah

In badan oo hawlaha ICRCda ka mid ahi waa isku-xiran. Si dadka biyo la siiyo waxaa loo baahan yahay koronto iyo hab dib loo nadiifiyo biyaha la isticmaalay. Sidoo kale, daryeelka dadka xanuunsan iyo kuwa dhaawaca ahiba waxay u baahan yihiin biyo, koronto iyo haraaga alaabta isbitaallada meel la isaga shubo. Ku lug-lahaanshadeena ma dhamaanayso mar coladaha ay dhamaadaan - dhaqangalnimada adeegyadaas annaga ayaa isku xil-saarnay illaa ay xukuumaddu awood u yeelato in ay iyadu gacanta ku qabato.

**Helitaanka biyo nadiif ah waa muhiim gaar ahaan waqtiyada dhibaatada. Ka dib markii duufaantii Haiyan ay xaaqday shabakadda biyo siinta maxalliga, ICRC waxay biyo la cabo siisay dadka gobolka Samar ee Filibiin.**




**Dagaallada ka dhaca magaalooyinka way kordheen. Sidaas darteedna injineeradeena biyaha iyo deegaanka ayaa diyactiyaan ayna joogteeyaan nidaamyada biyaha, korontada iyo maamulka qashinka ee sahal ahayn, sida sawirkaan tusayo magaalada Baqdaad, Ciraaq.**

# DARYEEL CAAFIMAAD

Daryeelka caafimaadka xilliyada ugu daran ee loogu baahi badan yahay waa xilliyada dagaalka. Iyada oo ciidanka iyo rayadkuba ay balaambalayaan, ayna dhimanayaan ayaa haddana waxaa suuraggal ah in bulshooyin dhan lagu qasbo inay barakacaan, iyaga oo naftooda la cararaaya. Xilliyadaas oo kale, waxaa hakada ama khasaara ama burbura kaabeyaashii caafimaadka iyo hababkii alaab ama daawo lagu keeni lahaa, si bulshooyinkaas daryeel caafimaad loogu fidiyo. Si weyn ayay xaaladahani halis ugu yihiin qof walba oo daryeel caafimaad isagu raadsanaaya iyo kii inuu siiya raba labadaba. Goobaha caafimaad ee weli shaqaynaya waxaa hafiya tirada dadka dhaawaca ah, kuwa cudurrada faafa hayaan amaba nafaqo-darro. Isla markaas, gacan-ka-hadalka dadweynaha ku dhex-fida ayaa wuxuu aad u adkeeyaa oo halis ka dhigaa ama wax aan suuraggal ahayn ka yeelaa sidii loo gaari lahaa halkii daryeel caafimaad laga heli lahaa.

## Hab isku dhan

Caqabadahaas kor ku xusan daraaddood, waxaa dhacda inaan waxbana laga qaban baahiyo dadka muhiim u ah, maalin walbana joogto ah, sida tallaallada, daryeelka hooyada, daaweynta cudurrada dabo-dheerada iyo wixii la mid ah. Isla caqabadahaas waxaa wax ku noqda nidaamka nadaafadda asaasiga ah, ilaha biyaha nadiifka ah iyo sahayda cuntada, taasina waxay sahlaysa in bulshooyinka ay u nuglaadaan cudurrada faafa iyo nafaqo-darrada. Si aan uga jawaabno baahiyahaas adag ee isku-xiran ah, waxaan adeegsannaa hab isku dhan ah. Qofka ayaa wax walba oo kale nooga horreeya, waxaannuna ku dedaalnaa sidaan daryeelka ugu wadi lahayn, laga soo bilaabo isla marka uu dhaawacmo ama uu xanuunsado. Waxaan geynaa oo lagula tacaalaa rug caafimaad ama isbitaal ilaa uu ka biskoonaayo, iskiisna uu isu maamulaayo. Hawshaas inta aan ku dhex-jirnana, si dhow waxaan ula shaqaynaa bulshooyinka maxalliga ah iyo wakaaladaha caafimaadka, si aan baahiyaha u qiyaasno, dabadeedna aan wax uga qabanno.

**Marka ay jirto colaad hubeysan ICRC waxay dhakhaatir qalliin, qalab iyo sahayba ugu deeqdaa isbitaalada maxaliga ah. Halkaan Isbitaalka Mirwais oo ku yaala Kandahaar ee dalka Afkhanistaan dhakhaatiirta qalliinka waxay qalliin ku sameynayaan nin dhalinyaro ah oo qaba gubasho daran.**

**Dagaalku wuxuu dadka dhibaato ugu dhigaa in ay helaan daaweynta caafimaadka, marka ay sida aadka ah ay ugu baahanyihiin.Kor dhanka midig, dhakhtar ka tirsan ICRC wuxuu baaraya wiil jooga isbitaal ku yaala Koofurta Suudaan.**


Jacob Simkin/ICRC



Marko di Lauro/Getty Images/ICRC

# Adeegyo caafimaad oo darafyo ballaaran

## Tababbarka iyo garab-siinta gargaarka degdegga ah

Gargaarka wuxuu ka bilaabmaa dadka ugu dhow kuwa baahida qaba. Si hadafkaas loo gaarana, ICRCdu waxay dhinaca gargaarka degdegga ah ka tababbartaa xubnaha bulshada, mutadawiciinta Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, shaqaalaha maxalliga ah ee xagga daryeelka caafimaadka iyo kuwo kaleba, si xaaladaha bukaannada ay u dejiyaan inta ay ka gaaraan meel ay ka heli karaan daryeel kooda ka sarreeya.

## Daryeelka caafimaad ee asaasiga ah

Taageeradeena waxay ku jaango'an tahay baahiyada maxalliga ah, caadi ahaan hawsheena waxay ka kooban tahay tallaabooyin ka-hortag ah (sida baahinta dhaqanka caafimaadka wanaagsan) iyo la-tacaalid. Arrimaha noogu muhiimsanna waxaa ka mid ah tallaalka, caafimaadka arrimaha taranka iyo daryeel xagga oogada iyo nafsadda ku saabsan oo aan siinno dhibbaneyaasha gacan-ka-hadalka galmada wax ku noqda.

## Isbitaallo iyo ka badan

Colaaddu waxay saamaysaa dhinac kasta oo caafimaadka bulshada ka mid ah. Sidaas awgeed, waxaan adeegsannaa tallaabooyin isku dhan oo daryeelka isbitaallada lagu heli karo. Waxaan wax ka qabannaa maaraynta isbitaalka, qalliinka, daweynta uur-ku-jirta, cudurrada carruurta, ummulista, cudurrada haweenka iyo, sidoo kale, in daryeel bukaan-jiif la siiyo dadka cudurrada faafo qaba.

## Caafimaadka dhimirka iyo kaalmada nafsi-bulshadeed

Hawlaha waaweyn ee ICRCda waxaa ka mid ah badbaadinta dadka rabshada darteed qarracmay. Daryeelka dhibbaneyaasha waxaa ka mid ah taageero xagga nafsadda iyo mid nafsad-bulsho; taas oo qayb ka ah dedaalkeena ku saabsan in bulshooyinka aan ka kaalmayno sidii ay uga soo kaban lahaayeen dhibkii dagaalka iyo rabshada ay ku reebeen.

## Caafimaadka maxaabbiista

Si daryeelka caafimaadka ee asaasiga ah ay maxaabbiistu uga faa'iideystaan, waxaan wax ka qabannaa baahiyahooda shakhsiga ah, isla markaasna waxaan hagaajinna biyaha xabsiga laga isticmaalo, fayo-dhawrka, nafaqada, daryeelka caafimaadka iyo nadaafadda guud. Intaas ka sokoow, waxaan wax ka qabannaa baahiyaha caafimaadka dhimirka ee dadka xorriyaddooda la weysiiyey, gaar ahaan kuwa la jir-diley ama siyaalo kale oo aan fiicnayn loola dhaqmay amaba qaba jirrooyin kale oo xagga maskaxda ah.




**Caruur ka fogaaneysa bambooyin farabadan oo aan qarxin oo looga tagay meel ku dhow garoon kubadda cagta lagu cayaaro oo ku yaala magaalada Basra, Ciraaq. Waxaanu ka shaqeynaa sidii looga hortagi lahaa in miinooyinka iyo aaladaha aan qarxin sida kuwan oo kale aysan dhaawac keenin.**

# FADDARAYN UU KEENO QALAB QARXA

Miinooyinka iyo hubka aan weli qarxini waxay kordhin karaan halista la soo gudboonaata dadka aagagga dagaalka ku nool iyo kuwa gurmadka ugu yimaada. Sidaas awgeed, xeeldheereyaasheena saanad waxay la shaqeeyaan, qaybna ka yihiin hawlgallada ICRCdu ay ku hubiso ammaanka shaqaalaheeda iyo dadka kaleba. Dhinaca kalena, wixii ay baaristooda ku ogaadaan ayay ku biiriyaan warbixinnadeena ku saabsan hannaanka ay colaaduhu u socdaan. Waxaan ku dhaqaaqnaa hawlo darfo ballaaran oo ay ku jiraan waxbarashada xagga haalika, bixinta miinada iyo hubka kale ee aan weli qarxin iyo, sidoo kale, daryeelka dhibbaneyaasha. Taasna waxaan bilawnaa inta ay colaaddu socoto, waana wadi karnaa ilaa ay dagaalladu joogsadaan.

**Qoysaska oo waayeen kuwii ay jeclaayeen intii lagu jiray sanadihii dagaalka ka socday dalka Beeruu ugu dambayntii waxay ogaadeen wixii ku dhacay waxaana mahad leh dadaalada mideysan oo ay sameeyeen adeegga barista meydadka ee dalka iyo ICRCda.**




Sanadkii 1983dii waxaan sameynay Khasnadda Gaarka ah ee dadka Naafada ah si loo hubiyo sii socoshada mashaariicda ay kafaalo qaadday ICRC-da. Khasnadda waxay kaloo taageerta xarumaha dhaqan-celinta naafada oo ku yaalaan dalalka dakhligoodu hooseeyo. Xarunta Addimada Macmalka ah iyo cudurka Dabeysha ee Gasa (Gaza) ayaa gabar farsamo yaqaan ah wiil yar bareysa in uu ku socodo kabo si gaar loogu sameeyey wiilka yar.

## Dhaqan-celiska naafada iyo dhexgalka bulshada

Waxyaabaha barnaamijyadeena dhaqan-celisku uu bixiyo waxaa ka mid ah jimicsiga xubnaha naafoobay iyo qalabka lagu dhaqdhaqaaqo sida kan maqalka, kan addimmada, kan lagu socdo iyo kuraasida ay naafadu isticmaasho. Hay'adaha maxalliga ahna waxaan ka kaalmaynaa siday awood ugu yeelan lahaayeen in iyaga qudhoodu ay adeegyadaas bixiyaan. Taas oo yaraynaysaa faquuqa dadka naafada ahi ay la kulmaan marka ay dhexgalka bulshada u xusul-duubayaan.

## Cilmiga Meyd-baarista iyo waxqabad Aadminnimo

Dadka ku geeriyooda dagaallada dhexdooda ama masiibooyinka dabiiciga ah ama iyagaoo muhaajiriin ah dhinta waa in jirkooda si maamuus leh loola tacaalaa. Waxay u baahan yihiin in la ogaado halka meydkoodu yaal, dabadeed la soo qaado oo la diiwaan-geliyo, dabadeedna la aqoonsado. Hawlahaasi waxay, ugu dambaystii, ka mid noqdeen shaqada Aadminnimo ee xubnaheena Meyd-garadku ay qabtaan, iyagoo adeegsanayaan qalabkii iyo hababkii ugu dambeeyey. Dadka cilmiga Meyd-baarista takhasuska u leh ayaa hay'adaha maxalliga ah waxay ka caawiyaan maaraynta haraaga meydadka inta ay colaaddu socoto iyo isla markii ay dhammaatoba. Waxay, sidoo kale, ka caawiyaan dedaalka meydadka loogu soo helaayo ee, haddana, lagu aqoonsanaayo; taas oo mararka qaarkood dagaallada ka dib muddo dheer sii socota.



*SHEEKO ICRC LAGU BARAN KARO*

# HOLMES OO MAR KALE LUGIHIISA ISKU TAAGEY

Oktoobar 2010kii, Holmes Fabian Ordonez oo u socda koorso ku saabsan maaraynta degaanka meel u dhow gurigiisa oo ku yaal waaxda Caqueta ee koonfurta Kolombiya ayaa miino ku joogsadey, halkaas oo cagihiisa middood uu ku waayey. Waxay ahayd dhacdo riyooyinkiisii oo idil baabbah ka dhigi kartey, laakiinse waxbarashadiisii jaamacadda ayuu sii watay, taasina waa mahad uu dulqaadashadiisa, taageerada ICRCda, Laanqayrta Cas ee Kolombiya iyo hay'ado kale oo maxalli ah.

Colaaddu markay dhammaato ama ay meel kale u wareegto, waxaa weli wax dila ama xubnaha jirka kala dhantaala walxaha qarxa sida miinooyinka, bambooyinka kuwa qarxi waaya, rasaasta madaafiicda iyo bambooyinka yaryar ee firirka badan sameeya. Dadka kuwaas aan ku dhimani waxay waayi karaan awoodda shaqaysiga, qabashada hawlaha kuwa ugu fudfududna karti uma yeeshaan. Inta badan waxay xataa lumiyaan rajada oo idil. Midda kale, waxaa isa soo taraaya dagaallada ka dhacaaya magaalooyinka dadka badan ku nool yihiin, taas darteedna walaaca laga qabo hallayska walxaha qarxa ee degaanka ayaa maalinba maalinta ka dambaysa soo kordhaaya.

"Qaraxa qudhiisu wax buu dhaawacaa, xubnaha oogadana wuu jarjaraa, waxaase jirta saamayn kale oo aan aad loo aqoon - midda nafsadda ku saabsan" ayaa waxaa yiri Luis Arturo Rojas oo ah takhtar qalliin oo Caqueta jooga, ICRCduna ay u tababbartay inuu taageero dadka qaraxyada caynkaas ah ka bedbaada. Wuxuu raaciyey: "Markii ay xubini kaa go'do, khasaaraha ugu weyni wuxuu noqon karaa in aadanba nolaansho oo dhan rabin."



Andrés Cardona/ICRC




**Geesinimada iyo xoogga Holmes Ordones oo ay weheliso taageerada ICRC iyo ururada maxaliga ah ayaa ku caawisay in dib u dhiso noloshiisa.**

Marka ay colaadaha ka jawaabeyso ee ay dooneyso qofqof iyo bulshooyin idilba inay ka kaalmayso furdaaminta saamaynta dirirta, isla markaasna dhaawacyo mustaqbalka ka dhaca ay u hor-joogsadaan, waxay ICRCdu ka faa'ideysataa waayo'aragnimo ay ka heshay culuun badan sida miino-bixinta, iska-fogeynta hubka, daryeelka caafimaadka, dhaqan-celiska naafada, gargaarka nafsiga iyo xeerka caalamiga ah ee Aadminnimo. Holmes wuxuu yiri: "ICRC ayaa wax walba ii ahayd. Shilkii ka dib, ciddii ugu horreysey ee i soo gaadhey iyaga ayay ahaayeen. Mar kale ayaan awood u yeeshay inaan lugahayga ku socdo; taasina iyaga daraaddood ayay ku dhacday. Wixii aan soo maray markaan dib eegayna, waxaan rumaystay in aan noloshu soohdimo lahayn".

### Ka-hortag

Si loo joojiyo saamaynta xun ee miinooyinka dadka loo dhigo iyo bambooyinka kala firdhaa ay rayadka ku leeyihiin, waxaan Dawladaha ku boorrinnaa inay ansixiyaan, shuruucda dalalkoodana ku daraan axdiyada maamnuucaaya farsamaynta, wareejinta iyo adeegsiga hubka caynkaas ah. Sidaas oo kale, Dawladihii axdiyadaas horay u oggolaaday waxaan xusuusinnaa inay ka dhabeeyaan xilka saaran ee ah in dhulka ay ka taliyaan ay ka sifeeyaan miinooyinka iyo hubka aan qarxin ee lagu aasay.

### Dhawris

Isla marka ay colaaduhu qarxaanba, ICRCdu waxay wadahadal joogto ah la gashaa kuwa qalabka sita, si loo hubiyo inaysan isticmaalin hub xeerka caalamiga ah lagu mamnuucay. Markay colaaddu soo af-jarantana waxaan kaloo xusuusinnaa waajibka ka saaran in aagagga qalabka qarxa lagu dhaafay ay ka sifeeyaan.

### Gargaar toos ah

Adduunka oo idil meelaha ay joogto, ICRCdu waxay dhaqan-celisaa dadka ku dhaawacma walxaha qarxa, waxayna bixisaa qalab gacan-ku-samays ah oo gacmaha iyo lugaha baddela, ulaha tallaab-siga loo cuskado iyo kuraasida lugaha leh. Isla markaasna, waxaan ku yaboohnaa hawlgallo aqoon sare ku dhisan, si walxahaas looga sifeeyo dhulka rayadku deggan yahay. Intaas oo idili waxay nagu dhiirri-gelineysaa inaan laballaabno dedaalkeena ku wajahan in qawaaniinta loo hoggaansamo hal-kii ay ka suurowdana aan u qareenno qawaaniin hor leh oo lagu mamnuucaayo amaba lagu xadey-naayo hubka noocaas ah isticmaalkiisa.

**Waxaan adeegsanaa dhammaan noocyada kala duwan ee qalabka isgaarsiinta si kor loogu qaado wacyiga heerarka dagaalka. Muuqaalkan waa fiidiyaw dhaqdhaqaaqaya oo ay soo saartay ICRC oo ku saabsan xeerka caalamiga ah ee aadamnimada cinwaankiisuna yahay "Shuruucda dagaalka (oo la soo koobay)." Fiidiyawga wuxuu sharxaya sida sharciga u ilaalinaayo rayidka, dhismayaasha daryeelka caafimaadka iyo maxaabiista markii ay socdaan dagaalada hubeysan. Si aad u daawato fiidiyawga tag: www. icrc.org/en/document/rules-war-nutshell.**



# DHAWRISTA

Inta badan dadka aan dagaallada ku jirin ayaa ah kuwa ugu daran ee colaadaha iyo rabshadaha kaleba ku saxariira. Tiro badan ayaa la dili karaa ama la dhaawaci karaa, ama waxaa lagu qasbi karaa inay dhul halis ah u baxsadaan, iyaga oo nabadgelyo-raadis ah. Marar badan, guryo, tuulooyin iyo magaalooyin dhan ayaa la baabbi'iyaa, iyada oo dadku waxay ku noolaayeen iyo gabbaadkoodiiba uu isla meeshaas ku bas-beelo.

## Dhawrista ku xusan xeerka

Rabshadaha baahsani markii ay qarxaan, rayidka ayaa si weyn ugu nuglaadaa, markaasna oo in la ilaaliyo u baaahda. Waxay ICRCdu ku dedaashaa inay hubiso dhinacyada dagaallamayaa inay waafaqaan

waajibaadka kaga beegan xeerka caalamiga ah ee Aadminnimo. Tusaale ahaan, Dawladuhu waa inay gutaan mas'uuliyadda ka saaran maxaabbiista la qabto inay si aadminnimo ku dheehan tahay ay ula dhaqmaan. Waxaa kaloo isla mas'uuliyaddaas tiir-dhexaad u ah xurmaynta wada-joogga qoyska, sharafta, bedbaadada oogada iyo maskaxda ee maxaabbiista.

## Ku-dhaqanka xeerka

Dhibaatada ICRCdu ay la kulanto marka ay isku daydo inay ka dhabayso ilaalinta rayadka xilliga colaadaha, looma aanayn karo goldaloolo uu xeerka aadminnimadu leeyahay. Dhibaatada runta ahi waa dhinacyada colaaddu u dhexayso oo ka gaabiyey in qawaaniintaas asaasiga ah ay ku dhaqmaan.



# GOOBJOOGNIMO IYO WADA-HADAL

Sida ku qeexan Axdiyadihii Jineefa ee 1949kii iyo Baratakoolladii Dheeraadka ee 1977kii, rayidka iyo qof kasta oo kale oo aan dagaalka toos uga qayb qaadin sina looma weerari karo. Si loo hubiyo damaanadaha xeerarkaas ku jira in la fuliyo, ICRCdu waxay ku dedaashaa inay mar walba goobjoog ka ahaato meelaha sida gaarka ah ay rayadku halis ugu jiraan. Dhinacyada ay arrintu khusayso oo idil, waxaan xusuusinnaa qawaaniinta nidaaminayo anshaxa xilliga colaadaha iyo ku-isticmaalka xoogga kuwa la xiriira waqtiga hawlgallada fulinta shuruucdu ay socdaan.

## Goobta colaadda

Ergooyinkeena markay awood u yeeshaan inay diiwaan-geliyaan xad-gudubyada xeerka, mas'uuliyiinta ayay la socodsiiyaan, waxayna weydiistaan inay tallaabo ka qaadaan. Halkii ay ka suuroobi kartaba, ergooyinkeena waxay taageeraan dadka colaadda wax ku noqda. Waxay kaloo wadahadal joogto ah ay la galaan kuwa hubka sita, ha ahaadeen ciidammada rasmiga ah, kuwa fallaagada ah, ciidammada booliska, ciidammada sida militariga u tababbaran iyo kooxaha kaleba.

**Xubin ka tirsan shaqaalaha ICRC oo xubno ka mid ah koox hubeysan oo ku sugan waaxda fog ee Chocó, Kolombiya u sharaxaya sharciyada xeerka caalamiga ah ee aadminimada.**




Juan Arredondo/Getty Images/ICRC




**Hay'adda ICRC waxay dawlad heerkeeda ugu sarreeya kala hadashaa arrimaha bani'aadanimada. Kor waxaa ka muuqda Madaxweynaha ICRC Peter Maurer oo khudbad ka jeedinaaya shirka 12aad ee dawladaha kuwaas oo iskuraacay in ay mamnuucaan miinooyinka lidka ku ah dadka**

## Heerar sare oo diblomaasiyeed

Waxaan kaloo la shaqaynaa heerarka ugu sarreeya ee diblomaasiyadda, si aan hubinno bedbaadada rayadka iyo maxaabiista. Dedaalka diblomaasiga ah waxaa xoogga lagu saaraa arrimo aadminnimo oo gaar ah sida kaalmo-gaarsiinta dadka ku xayirma aagagga colaaadeed, booqashada xabsiyada iyo fududaynta xabbad-joojinnada ku-meel-gaarka ah ee aadminnimo, lana dhex-dhigo dhinacyada dagaallamaaya. Dedaalka caynkaas ah iyo kuwo kaleba waxay damaanad-qaadayaan xuquuqda asaasiga ah ee dadka aan ilaalintooda u xusul-duubno; xuquuqdaas oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka iyo inay awood u yeeshaan inay dakhli la soo bixi karaan.

Xataa waqtiga nabadda, ICRCdu waxay joogteysaa wadahadalka Ciidammada Qalabka Sida ay kula jirto. Waxaan ku dhiirri-gelinnaa in shuruucda xeerka aadminnimo ay talada ku darsadaan marka hawlgallada militari ay qorshaynayaan iyo marka ay fulinayaan.



Nick Danziger/ICRC

Iyadoo ICRC eegeyso, askarta Afkhanistaan waxay ka qeyb qaadanaayan tababar ku saabsan sida loola dhaqmo maxaabiista si waafaqsan xeeraka caalamiga ah ee aadminimada. Mararka qaarkood ICRC waxay cayaartaa doorka ah kor-jooge inta lagu guda jiro layliyada tababarka.

# WACYI-GELINTA XAGGA DHAWRISTA MAXAABBIISTA

Dadka xorriyaddooda laga qaadaa xaalad aad u nugul ayay ku sugan yihiin. Nugeylkaasina wuxuu ugu sii daran yahay marka colaadda hubaysan iyo rabsho kale ay socdaan, waqtigaas oo isticmaalka xad-dhaafka ah ee xoogga iyo nolosha xabsiguba ay aad uga sii daraan. Sidaas darteed, ICRCdu waxay isku hawshaa sidii loo hor-joogsan lahaa afduubka qasabka ah, dilka shuruucda ka baxsan, jir-dilka iyo noocyada kale ee dhaqan-xumo. Waxaan soo celinnaa xiriirkii maxaabbiista iyo qoysaskooda, markii loo baahdona waxaan ka shaqaynaa sidii aan u hagaajin lahayn xaaladaha maxbuuska, si waafaqsan xeerka caalamiga ah iyo heerarka loo qeexay ee laga raalli-noqon karo.

## Waraysiyo gooni-gooni ah

Booqashooyin joogto ah meelaha maxaabiista lagu hayo aad bay muhiim u tahay hawsheena oo ah kaalmaynta maxaabiista. Wixii aan markaas soo aragno, waxaan ku gudbinnaa warbixinno qarsoodi ah oo aan madaxda u dirno, markii loo baahdana gargaar la taaban karo ama mid caafimaad ayaan maxaabbiista ugu deeqnaa. Booqashooyinka inta lagu jiro, ergooyinka ICRDdu maxaabbiista ayay si goonni-goonni ah u waraystaan. Waxay si faahfaahsan uga qortaan xaaladda maxaabbiista, si ay loola socdaan. Maxaabbiistu waxay tilmaan ka bixiyaan dhibaatooyinka ay qabaan; kuwaas oo laga walaaci karo, aadminnimo ahaan.

ICRCdu waxay ka fogaataa inay mawqif ka qaadato sababaha maxaabbiista loo haysto ama kuwa markoodii horeba loo soo qabtay.  Waxaan isku daynaa inaan hubinno maxaabbiistu inay ka faa'ideystaan damaanadaha sharciga ah ee ay xaqa u leeyihiin, marka la eego xeerka caalamiga ah iyo midka maxalliga ah labadaba.

## Eegista hannaanka oo idil

Marka aan madaxda la talinayno, xaalado shakhsiyadeed keli kalama hadalno ee waxaan farta ku fiiqnaa goldaloolooyinka hannaanka oo dhan ka muuqda kuwaas oo saamays ku leh caafmaadka iyo ladnaanta maxaabbiista. Sidaas darteed, talada aan madaxda siinnaa waxay ku salaysan tahay qiimayn dhinac walba ah oo ku saabsan hannaanka maxaabbiista loo hayo sida qawaaniinta iyaga la xiriirta, dhaqanka maamul, dhismaha xabsiga, noocyada cuntada laga bixiyo iyo tayada daryeelka caafimaadka.

**Si aad u hesho warar dheeraad ah, una ogaato shuruudda ICRCda looga baahan yahay si ay booqasho u samayso, arag www.icrc.org/discover**



James Nachtwey/ICRC/VII

## Xaq la aqoonsan yahay

Colaadaha hubaysan ee caalamiga ah markii la eego, Axdiyadihii Jineefa waxay aqoonsan yhiin xaqa ay ICRCdu u leedahay booqashada maxaabbiista dagaalka iyo la-haysteyaasha rayadka ah. Xeerka caalamiga ah ee aadminnimo waa ku xad-gudub haddii ergooyinkeena laga hor-joogsado inay hawlahooda qabsadaan. Colaadaha hubaysan ee aan caalami ahayn markii la eego, qodobka 3d ee 4tii Axdi ee Jineefa wuxuu noo oggolaanayaa in adeeggeena aan u fidinno dhinacyada colaaddu ka dhexayso. In badan ayaa oggolaada markaan u soo jeedinno in aan maxaabbiista booqanno, qayb ahaanna waxaa ugu wacan kalsoonida aan dhankaas ka kasbannay. Xaaladaha colaadeed aan mid hubaysan weli gaarin, waxaan soo jeedinnaa in aan maxaabbiista booqanno; taas oo ku salaysan Xeerka Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah iyo Bisha Cas.

# DHAWRISTA DADKA NUGUL

Dadka rayadka ah waxaa ku jira qaybo xeerka caalamiga ah uu si gaar ah u dhawrayo (haweenka, carruurta, qaxootiga iyo barakacayaasha). Dadaalka aan ugu jirno si la dhawro dadkaas nugulka ah wuxuu xoogga ku saaraa si kor loogu qaado awooddooda si ay xaal ugu helaan dhibaatooyinkooda. Waxaan aad isugu hawlnaa sidii aan kooxahaan ugu suuraggelin laheyn inay sharaf iyo bedbaado ku noolaadaan.

## Barakacayaasha

Marar badan, oraahda colaadda hubaysan waxaa loola jeedaa rayad faro badan oo lagu qasbo inay ka cararaan guryahooda, meel kale oo gudaha dalkooda ka mid ahna ay gabbaad ka raadsadaan. Xaaladaha intooda badan, barakacayaashu waxay ku qasbanaadaan, wax yar mooyee, hantidooda oo idil inay ka tagaan. Sidoo kalena, waxay lumiyaan wax walba oo ay noloshooda u kaashan lahaayeen. Xaaladda ay ku jiraan ee xanuunka leh darteed, barakacayaashu waxay meel sare kaga jiraan kooxaha gar-gaarkeena uu gaaro.

## Qaxootiga

Dadka iyaga oo cararaaya soohdimaha caalamiga ah isaga tallaaba, qaxootinnimona loo aqoonsadaa waxay xaq u leeyihiin ilaalin iyo gargaar ay ka helaan Xafiiska Madaxa Sare ee Qaxootiga ee Qarammada Midoobey. Xaaladahaasi markay jiraan, ICRCdu waxay cayaartaa kaalin-taakulo, gaar ahaan halkii xeerka aadminnimada ilaalinayo qaxootigu. Waxaan kaloo bixinnaa adeegga farriin-tebinta Laanqayrta Cas, kaas oo qaxootiga ka kaalmeeya siday ula xiriiri lahaayeen xubnaha qoysaskooda ay colaaddu kala kaxeeyeen.



Didier Revol/ICRC

ICRC-du waxay caawinta dadka barakacay iyo qaxootiga kuwaas oo inta badan ka soo taga waxwalba marka ay ka cararayaan dagaalada hubeysan ama rabshadaha. Dadkaan waxay ka soo tageen Suuriyaa waxayna Jordaan oo deris la ah soo gaareen 2013kii.




Christian Katsuva Kamate/ICRC

**Inta lagu guda jiro dagaalada, gaar ahaan caruurtu waxay u nugulyihiin in lagu danaysto iyo in lagu xad-gudbo. Magaalada Goomaa ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Koongo xubin ka tirsan shaqaalaha ICRC waxay xarunta hakashada iyo hanuuninta oo loogu talagalay caruurta loo qortay ciidamada iyo kooxaha hubeysan kula hadleysaa wiil dhalinyaro ah.**

## Carruurta

Waxaa suuraggal ah colaadda iyo gacan-ka-hadalka kale dartood in carruurtu ay qoysaskooda ka lunto, in lagu qasbo inay guryahooda ka tagaan, in la dilo, in xubnahooda qaarkood la awood-tiro, in galmo ahaan loogu xadgudbo ama si kaleba looga faa'ideysto. Waxay kaloo markhaatiga koowaad ka noqon karaan falal bahalnimo oo lagula kacaayo waalidkood iyo xubno kale oo qoyskooda ka mid ah.

Dhinaca kale, in kastuu xeerku ka dhawrayo, haddana, meelo dunida ka mid ah, weli carruurta waxaa, askar ahaan, u qorta ciidammada qalabka sida iyo kooxaha kale ee hubaysan. Inta badan hubka ayay qaadaan, si dhab ahna dirirta ayay uga qayb-galaan. Ama waxaa suuraggal ah in loo adeegsado hawlo kale oo halis weyni ay ugu sugan tahay sida saadka qaadistiisa.

**Si warar gaar ahaaneed oo dheeraad ah aad uga ogaato sharciga ilaalinta carruurta, eeg www.icrc.org/discover**

# GARGAARKA DEGDEGGA AH KA SOKOOW

Markii ugu horreysey ee Antoinette Mkindo Mbila ay ICRCda la xiriirtay waxay ahayd abbaaraha dabayaaqada sanadihii 1990 uu dagaal ka qarxay dalkeeda oo ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Koongo. 18 sano ayay jirtey. Waxay tiri: "Waxaan xusuustaa ICRCda oo carruurta iyo waalidkooda kala luma isu keenaysa".

Qiyaasta, toban sano ka dib markuu haddana dagaalkii bilawday ayay aragtay astaanta ICRCda lagu yaqaan oo mar kale shaqo ku jirta. Waxay tiri: "Waxaan xusuustaa niman funaanadaha ICRCda ku lebbisan oo ku socda miyiga, halkaas oo, dirirta awgeed, ay dad badani u carareen. Nimankaasi dhaawaca ayay ku sideen sariiraha dadka buka lagu soo qaado.




## Dhaawaca oogada ka sokoow

Laakiinse, Antoinette markay ICRCda sii baratay ayay ogaatey in aanaan ku koobnayn la-tacaalidda dhaawacyada degdegga ah oo keliyahe, aanu wax ka qabanno saamaynta muddada dheer ee xagga jirka iyo shoogga nafsiga ah ee gacan-ka-hadalku uu sababo. Antoinette waxay asaastay hay'ad ka shaqaysa horumarinta caafimaadka dumarka iyo danahooda dhaqaale. Sannadkii 2008dii ayay go'aansatay inay ka qayb-qaadato kooras aan bixinno oo ku saabsan kor-u-qaadidda wacyiga caafimaadka iyo bedbaadada ee dumarka dagaallada lagu kufsado.

Laga soo bilaabo xilligaas, Antoinette waxay u tabo-baratay kaaliye nafsi-bulshadeed, waxayna madax ka noqotay rugta lagu magacaabo maison d'écoute, halkaas oo ah dumarka gacan-ka-hadalka xagga galmada ah loo geystey ay kaga sheekayn karaan, talooyinna lagu siiyo, iyaga oo aan cabsaneyn in dembi loo qabsado amaba ceeb looga dhigo. Waxay tiri: "Waxaan qaadannay tababbar aad u wacan oo ku saabsan garashada astaamaha gacan-ka-hadalka galmada iyo sidii farsamo lagu furdaamiyo aan u heli lahayn".

## Kaalmada dhibbaneyaasha gacan-ka-hadalka galmada

Dhibaatooyinka qaarkood meelaha ay ka jiraan, waxaan bixinnaa xirmo idil oo kufsiga ka dib lagu talo-galay. Waxaa ku jira uuraysiga aan la dooneyn dawada looga hor-tago, midda lagu hor-joogsado isu-gudbinta feyruska HIVga loo yaqaan, la-tacaalidda cudurrada galmada lagu kala qaado iyo tallaallada ka-hortagga teetanaha iyo cudur-beerka nooca B. Waxaan, sidoo kale, talooyin siinnaa dhibbaneyaasha, si ay uga soo kabtaan dhaawacyada gacan-ka-hadalka galmadu ay ku reebaan.

## Haween iyo hablo

ICRCdu waxay gargaartaa dhammaan dhibbaneyaasha colaadaha. Laakiinse, haweenka iyo habluhu waxay leeyihiin baahiyo caafimaad oo gaar ah, kuwo ilaalineed iyo qaar kale oo wax-ka-qabadkoodu ay hawlahayna ku jiraan. Waxaan xoogga saarnaa xilliga colaadaha in haweenka iyo hablaha la dhawro, kuwa dagaalamayana waxaan ku wacyi-gelinnaa, in nooc kasta oo uu yahayba gacan-ka-hadalka galmadu uu reebban yahay, taas oo xeerka aadminnimada ku xusan.

**Si aad warar dheeraad ah aad uga hesho haweenka iyo dagaalka, arag www.icrc.org/discover**



Catalina Martin-Chico/ICRC

**Marka la xiro haweenka, waxaan raadinaa in aan hubino in baahiyahooda gaarka ah loogu fuliyo si waafaqsan xeerka caalamiga ah.**

# DIB U SOO-CELINTA XIRIIRKA QOYSASKA KALA LUMAY

Sannad kasta, qoysas kumaanyaal ah ayaa ku kala luma colaadaha, guuldarrooyinka dabeecadda amaba ifafaalaha isa soo taraya ee haajiridda. Si xun ayay dadku u dhibaatoodaan markay waayaan xubnaha ay jecel yihiin ee qoyskooda. Ma garanayaan halka ay ku sugan yihiin, inay nabad-qabaan iyo in kale iyo xataa inay nool yihiin iyo inay geeriyoodeen.

Dunida oo idil, ICRCda iyo Ururada maxalliga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan siday dadka maqan meel ugu sheegi lahaayeen, dabadeedna mar kale iyaga iyo eheladooda dib la isugu soo celiyo. Waxaan isku daynaa inaan helno xubnaha maqan ee qoysaska, in xiriirkoodii go'ay aan dib u soo celinno, dibna u midayno, dabadeedna waxaan ogaannaa dadka weli maqan waxa ku dhacay.

## Wakaaladda dhexe ee baafinta

Hawlahaan waxaa isku duwa Wakaaladda Dhexe ee Baafinta, taas oo loo abuuray inay soo celiso xubnaha qoysaska ku kala luma colaadaha iyo gacan-ka-hadalka kale. Sannad walba waxaa galal loo furaa boqollaal kun oo xaalado cusub ah sida barakacayaal, qaxooti, maxaabbiis amaba dad la la' yahay. Websitkena Soo-celinta Xiriirka Qoysaska wuxuu ogolaanayaa dadka in ay si sahal ah u baafiyaan markii xaaladaha degdegga ay dhacaan.

**Si warar dheeraad ah aad arrintaan uga ogaato, arag www.familylinks.icrc.org**




Marko Kokic/ICRC

**Ka dib dhul gariirkii Haiti 2010kii, ICRC waxay bixisay telefoono dayax-gacmeed ku shaqeeya si dadka loogu caawiyo in ay la xiriiraan kuwii ay jeclaayeen.**

*SHEEKO ICRC LAGU BARAN KARO*

# MAXBUUS HORE OO JAWAABO HELAY

1975kii dalka Chile markii uu ku hoos jirey kelitalisnimadii militariga ayaa waxaa la xiray Dr Patricio Bustos, kaas oo mar dambe sheegay, in booqashooyinka ergooyinka ICRCda ay ka badbaadiyeen in uu ka fogaado qaddar ee dad farabadan ay isku waddan yihiin ku dhacday. Wuxuu yiri: Maadaama ay ICRCdu i diwaangalisay, ayna qoyskayga u sheegtay in aan noolahay, taasi ayaa suuragalisay in aan la i khaarajin". Hadda oo 40 sano ay xilligaas ka soo wareegtey, Bustos wuxuu agaasime ka yahay adeegga meyd-baarista (forensic) ee dalka Chile. Hawlaha ay qabtaan kuwa ugu waaweyn waxaa ka mid ah qoysaska waqtigii kelitalisnimada xubnihii ay jeclaayeen ee sida qarsoodiga ah loola tegey inay ka caawiyaan sidii ay u heli lahaayeen jawaabo ku saabsan halkii ay ku dambeeyeen.




Adeegga meyd-baarista ee Chile wuxuu maanta tusaale u yahay Dawladaha kale ee cilmigaas kaashada, si ay u qeexaan haraaga jirka dadka la waayo. Dedaalladaas ICRCdu waxay ka qaadataa qayb-libaax, waxaana ka mid ahaa qeexidda dadkii ku baabba'ay dhul-gariirkii 2010kii iyo isla sannadkaas aakhirkiisii xabsiga magaalada Santiago dabki ka kacay ee 81 qof ay ku naf-waayeen. Wada-shaqaynta uu ICRCda la yeeshay waxay Bustos dhaxalsiisay in wax badan oo kale uu ka ogaadey baaxadda hawlaha aadminnimo ee ay u darban tahay. Wuxuu yiri : «Intii ICRCdu aysan xabsiga igu soo booqan ka hor ayaan aqiin Henry Dunant oo asaasaheeda ahaa iyo, sidoo kale, xilliga dagaallada shaqada ay qabato. Laakiinse, in ay maxaabiista booqato ayaa ahaa wax igu cusub». 1990kii markii keli-talisnimadii la soo af-jaray, ICRCdu waxay hanatay kalsoonida dadweynaha marka la eego gargaarka qoysaska laga maqan yahay, taasna waxay ku heshay mawqifkeeda dhexdhexaadnimo iyo eexasho-la'aanteeda joogtada ah. Shaqadeena qaarkeed waxay ku saabsan tahay Dawladaha, ciidammada qalabka sida iyo kooxaha hubaysan inaan xusuusinno waajibka akhlaaqeed iyo midka sharci ee ka saaran bixinta wararka qoysaska ka kaalmayn kara ogaanshaha waxa ku dhacay kuwa ka maqan ee ay jecel yihiin.

## Dadka la la' yahay iyo xaqa ka-warqabkooda

Xeerka caalamiga ah ee aadminnimo marka la eego, Dawladaha ayaa xilka ugu weyni ka saaran yahay inay is-hortaagaan dadka oo 'si qarsoodi ah' loo waayo, isla markaasna ay daboolaan baahiyaha qoysaskooda. Waxaan xukuumadaha talo ka siinnaa habka xaaladaha dadka la la' yahay loo baaro. Isla markaas, waxaan ka caawinnaa sida haraaga ruuxa dhinta laga yeelaayo. Waxaan kaalmo ka geysannaa meyd-baarista sida loo qabanaayo, si loo ogaado haybta kuwa geeriyoodey. Muddada ay hawlahaasi socdaanna, waxaan gargaar u fidinnaa qoysaska jawaabaha u oomman.



# KA-HORTAG

ICRCdu waxay isku daydaa sidii ay u yarayn lahayd colaadaha hubaysani saamaynta ay ku yeeshaan dadka noloshooda iyo sharaftooda, annaga oo dhinacyada colaaddu ka dhexayso si xoog leh u xusuusinna in xataa xilliyada dagaalka ay jiraan shuruuc ay qasab tahay in la raaco.

Shuruucda dagaalku waxay ku urursan yihiin midka, si guud ahaaneed, loogu yeero xeerka dagaalka ama xeerka caalamiga ah ee aadminnimada. Ujeeddada xeerkani wuxuu yahay in la is-hortaago, lana xadeeyo waqtiga colaadda hubaysan lagu jiro xanuunka binii-aadanka ka soo gaara, iyada oo Dawladaha iyo kooxaha aan dawladda ahayn ee hubaysan la weydiisanayo inay isxakameeyaan marka ay xoogga adeegsanayaan, ujeeddadooduna ay noqoto inay wiiqaan oo keliya awoodda cadowga ka soo hor-jeeda.

## Kobcinta texgelinta loo hayo xeerarka dagaalka

Waxaa qasab ah in la dhawro qawaaniinta dagaalka, taasina kuma koobna oo keliya xukuumadaha iyo ciidammadooda qalabka sida. Waxaa iyaguna isla arrintaas ku qasban yihiin kooxaha hubaysan ee aan dawliga ahayn, isla markaasna abaabulan. Sababtaas awgeed, waxaan la shaqaynaa dhammaan dhinacyada ay colaaddu ka dhexayso, si aan u hubinno inay fahamsan yihiin waajibaadkooda xeerka aadminnimada ku qeexan. Dhinacyadaas marka aannu ku wacyi-gelineyno qaybo badan oo ka mid ah xeerka aadminnimada, waxaan raadineynaa inaan hor-joogsanno ama, ugu yaraan, aannu xadeyno foolxumooyinka ugu daran ee dagaalka.

**Xubin ka tirsan ICRCda oo kala hadlaya askar xeerka caalamiga ah ee aadminnimada dalka Mali.**



S. Ismael/ICRC

# FARRIIN-GARSIINTA KHADKA HORE EE DAGAALKA

Gacan-ka-hadalka baahsani markuu 2014kii ka qarxay Jamhuuriyadda Afrikada Dhexe, hawshii ugu horreysey ee ICRCdu ku dhaqaaqday waxay ahayd in dhaawaca ay gargaar degdeg ah gaarsiiso, kaalmo wax-ku-ool ahna ay u fidiso dadkii dirirtu ay barakicisay. Taasina waxay noogu suuraggashay annaga oo wada-shaqayn la yeelannay Laanqayrta Cas ee Afrikada Dhexe iyo xubno kale oo Dhaqdhaqaaqa ka tirsan.

Sida colaado badan ka dhacda, hawlgaladeena gargaarka ka sokoow, waxaan hor-joogsanney ama, ugu yaraan, aan aad u yaraynay dhibaatada dadka xabbad-isweydaarsiga ku dhex-xayirma. Si taasi ay noogu suurowdana, wada-xaajood joogto ah waxaan la galnay dhammaan dhinacyada colaaddu ka dhexayso, annaga oo ku dhiirri-gelineyna xeerka aadminnimada inay dhawraan.

Colaaddu ay sii socoto ayaan la kulannay xubnaha ciidammada caalamiga ah, kooxaha hubaysan, jendaarmariiga, booliska iyo, weliba, rayadka hubaysan, si looga wacyi-geliyo xurmaynta iyo ilaalinta dhaawaca, bukaanka, maxaabbiista iyo, guud ahaan, dadweynaha rayadka ah.

Hawsha taallaa waxay noqon kartaa tu' niyad-jab keeni karta, marka loo eego degaan caro, nacayb iyo kala-aarsi ay buuxiyeen. Jean François Sangsue, madaxa ergada ku sugan Bangui, xarunta Jamhuuriyadda Afrikada Dhexe ayaa yiri: «Waqti ayay qaadanaysaa, haseyeeshee waa in aannaan ka daalin sharxidda iyo faafinta ku-dhaqanka xeerka aadminnimada. Xeerka oo si wacan loo bartaa wuxuu dadka ka hor-joogsan karaa inay jebiyaan».




**Ergey ka tirsan ICRC oo askar iyo saraakiil boliis Jamhuuriyadda Afrikada Dhexe ugu sharxaya xeerka caalamiga ah ee aadminimada iyo sharciga xuquuqda aadanaha.**

## Ciidanka qalabka sida ee Dawladda

Waajib qaanuuni ah ayaa Dawladaha ka saaran inay hubiyaan, heer kasta ha joogeene, ciidammadooda qalabka sida inay si wanaagsan u og yihiin xeerka colaadaha hubeysan. Waxaa kaloo qasab ku ah inay hubiyaan shuruucdaas oo idil in lagu dhaqmo, xaalad walba ha lagu jiree. ICRCdu waxay dhiirri-gelisaa xurmaynta xeerka caalamiga ah ee aadminnimada iyo ku-dhaqankiisa marka la eego sharci-dejinta maxalliga ah. Sidoo kalena, waxay ICRCdu Dawladaha ka caawisaa sidii xeerkaasi uu qayb uga noqon lahaa caqiidada militariga iyo tababbarkooda.

## Kooxaha hubaysan ee aan dawliga ahayn

Badiba colaadaha hubaysan ee xilliyadaani ma aha kuwo caalami ah. Waxay u dhexeeyaan dad hub sita oo aan lahayn tababbar rasmi ah, haddii ay leeyihiinna aan buurneyn. Sidaas awgeed, waxaan ku dedaalnaa in aan la xiriirno dhammaan dhinacyada colaadda, kuwaas oo kooxaha hubaysan ee aan dawliga ahayni ay ku jiraan. Habka caynkaas ah ayaan kor ugu qaadi karnaa ka-warqabka xeerka aadminnimada, hawlaha ay qabtaan iyo sida ay u qabtaan hay'adaha kala ah ICRCda iyo Ururada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Amniga shaqaaalaha hawlaha aadminnimada ayaan kor u qaadnaa, taas oo u sahasha inay dhibbaneyaasha colaadaha halkooda ugu tagaan.

## Hay'adaha dhaqan-gelinta xeerka

Sidaas oo kale, waxaan si joogto ah ula shaqaynaa booliska iyo ciidamada nabadsugidda, kuwaas oo marar badan loogu yeero in colaadda hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kaleba ay soo faro-galaan. Waxaan sharaxnaa hawsheena, isla markaasna waxaan hubinnaa ciidamadaasi inay helaan tababbar ku saabsan sida loo meel-mariyo xeerka aadminnimada iyo midka xuquuqda aadanaha marka ay ku jiraan hawlgallada xeerka lagu dhaqan-gelinaayo.

## Saaxadda caalamka

Xaaruunteena dhexe iyo ergooyinkeenaba waxay ku hawlan yihiin diblomaasiyadda aadminnimada heerkeeda maxalliga ah, keeda goboleed iyo keeda caalamiga ah intaba. Dadka laga yaabo inay wax ka qaban karaan ayaan la soo qaadnaa arrimaha mudan in laga walwalo sida aayaha dadka dirirta ku dhex-xayirma, qaybinta gargaarka aadminnimada iyo gaarista meelaha dadka lagu xiro.

## Indho-ku-haynta mustaqbalka

Waxaan kaloo xoogga saarnaa kor-u-qaadista aqoonta ku saabsan xeerka aadminnimada ee warbaahinta, dugsiyada, jaamacadaha iyo shirkadaha (oo ay ku jiraan kuwa ka hawl-gala meelaha ay dirirtu ka aloosan tahay). Markaannu aqoontaas dadweynaha ku dhex-baahineynana, waxaan rajeyneynaa in heerka xurmaynta iyo ku-dhaqanka xeerka aadminnimadu uu kordho.


# HIGSIGA MUSTAQBAL MIDKA MAANTA KA AADMINNIMO ROON

Wakiillo ka kala socda 16 dal ayaa saxiixay heshiiskii asalka ahaa ee Jineefa sannadkii1864kii. Markaas laga soo bilaabo, ICRCdu waxay cayaareysey kaalinta ugu weyn si ay u baahiso, una horumariso xeerka aadminnimada ee caalamiga ah; kaas oo xilliga colaadda dadweynaha ilaaliya, meel sarena kaga xusa gargaarka aadminnimada xaqa ay u leeyihiin.

Weli waxaan kaalin firfircoon kaga jirnaa samaynta shuruuc cusub oo lagu yarayn karo dhibaatada aadanaha, isla markaasna waxaan u halgannaa hubinta ku-dhaqanka kuwii horay u jirey. Habka loo dagaallamo iyo hubkuba way isbedeleen. haseyeeshee, sidii hore si ka badan ayay bulshada caalamku uga war-qabtaa silica uu dagaalku sababo, taasina, qayb ahaan, waxay ku suurowdey shaqada ICRCda iyo xubnaha kale ee Dhaqdhaqaaqu ay qabteen.

## Dhaqan-gelinta xeerka

Tusaale ahaan, Dhaqdhaqaaqa iyo Dawladaha saxiixay Axdiyadii Jeneefa waxay 2011kii wada qaateen qorshe shaqo oo ICRCdu soo dajisay oona soconaya muddo afar sano ah. Ujeeddada qorshuhu wuxuu ahaa sidii rayadku uu ku heli lahaa gargaarka aadminnimada iyo sidii loo horumarin lahaa ilaalinta dadka qaarkiis sida carruurta, haweenka, kuwa laxaadka la' iyo suxufiyiinta.




ICRC Archives

**Aasaasida ICRC waxay si toos ula xiriirta saxiixii dhacay sanadkii1864tii ee asalka Axdiga Jenefa oo ku saabsanaa Hagaajinta Xaaladda Ciidamada ku Dhaawacma Goobta dagaalka (bidix). Axdiga wuxuu dejiyey asaaska xirmo shuruuc ah oo dhawraya dadka waqtiyada dagaalka lagu jiro.**

**Kor dhanka midig, ICRC oo khudbad ka jeedineysa shirka Midowga Yurub 2014 oo ku saabsan hubinta ilaalinta shaqaalaha iyo dhismaha daryeelka caafimaadka.**



Thomas Vanden Driessche

## Axdiyada xeerka aadminnimada

Afartii Axdi ee Jineefa ee 1949kii iyo saddexdii Baratakool Dheeraad ah ee 1977kii iyo 2005tii dib laga raaciyey ayaa haddana waxaa lagu sii daray heshiisyo kale oo muhiim ah. Waxaa ku jira heshiisyo lagu mamnuucayo isticmaalka hubka sababi kara dhibaato aan la aqbali karin sida xabbadaha sii qarxa (1868), xabbadaha fida (1899), hubka kiimikada iyo biyoloojiga laga sameeyo (1925, 1972 iyo 1993), rasaas isticmaalaya qaybo aab la arki karin (1980), hubka leysarka ka samaysan ee lagu indho-beelo (1995), miinooyinka dadka loogu tala-galo (1997) iyo saanadda kala firirta (2008dii). Waxaa kaloo iyaguna jira heshiisyo lagu xadeynayo isticmaalka hubka qaarkiis sida, tusaale ahaan, hubka ololku ka dhasho (1980), iyada oo hubkaas aan dhammaan si guud ahaaneed loo mamnuucin.

## Hub cusub: Fursad cusub oo dagaal lagu qaado

Dabeecadda dagaalka iyo hubkuba in kastoo ay isbaddelayaan, haddana waxaa qasab ah in xeerka aadminnimada mar walba lagu dhaqmo. Sidaas oo ay tahay, haddana wax fudud ma aha qawaaniinta jirta in lagu dabbaqo teknoloojiyadda cusub. Teknoloojiyadu qawaaniinta dhexdeeda si caddaan ah ma ugu qeexan tahay? Saamaynteedu maxay noqon doontaa? ICRCdu si joogto ayay uga qayb-qaadataa doodaha hubkaas ku saabsan iyo caqabadaha ay xeerka aadminnimada ku yihiin.



Marko Kokic/ICRC

Calaamad ka digeysa khatarta ay leedahay hubka aan qarxin gudaha Lubnaan.

# XADEYNTA KHASAARAHA AADANAHA DAGAALKA

Walwalka xagga hubka naga hayaa wuxuu ku eg yahay oo keliya xagga aadminnimada. Dhammaan 150kii sano ee aan jirney, waxaan ahayn markhaati-horaad goobta ku sugan; ujeeddadeena waxay ahayd in aan Dawladaha ku baraarujinno khasaaraha weyn ee aan la aqbali karin hubkaasi uu aadanaha u geysto. Annaga oo ku hawl-galeyna awoodda nala siiyey ee ku saabsan ilaalinta dhibbaneyaasha colaadda hubaysan ama gacan-ka-hadalka kale, waxaan Dawladaha ugu yeernay inay soo saaraan qawaaniin caalami ah oo dhibaatadaas wax lagaga qabto.

## Baaqyo Dawladaha ku socda

Dhawr tusaale : 1918kii waxaan Dawladaha ugu baaqnay inay mamnuucaan sunta iyo gaasaska sababa neef-qabatowga iyo miyir-beelka (baaqaas oo u horseeday qaadashada Baratakoolkii Jineefa ee 1925kii); 1945kii, markii ugu horreysey waxaan Dawladaha ugu yeernay inay mamnuucaan hubka nukliyeerka; 1994kiina, Dawladaha qaybta ka ah Heshiiskii ku saabsanaa Hubka Caadiga ah ee gaar u Tilmaaman (Certain Conventional Weapons 'CCW') ayaan ugu yeernay inay mamnuucaan hubka leysarka ah ee dadka indhaha ka rida, isla 1994kiina waxaan Dawladaha ugu yeernay inay mamnuucaan, isla markaasna ay baabi'iyaan miinooyinka hawlwadeennada waxyeelleeya, sannadkii 2000na waxaan dawladaha ugu yeernay inay wax ka qabtaan dhibaatooyinka miinooyinka iyo hubka aan weli qarxini ay sababaan. Dedaalkaasina wuxuu suuraggal ka dhigay Baratakoolka V ee magaciisa CCW lagu soo gaabiyo, kaas oo sannadkii 2000 Dawladaha ku waajibiyey inay diiwaan-geliyaan, isla markaasna ay bixiyaan wararka ku saabsan meelaha miinooyinka iyo hubka aan weli qarxini ay ku aasan yihiin. Waxaa, sidoo kale, laga xil-saaray meelahaas halista ah nadiifintooda.

## Ciidamada ammaanka ee gaarka loo leeyahay

Shirkado militari iyo kuwo nabadsugideed ayaa sanadihii u dambeeyey sii kordhiyeen adeegyo ay ka bixiyaan aagaga ay colaaddu ka jirto. Adeegyadaasi waxay isugu jiraan taakulaynta xagga saadka ilaa maaraynta goobaha, xaaladaha qaarkoodna si toos ah ayayba colaadaha uga qayb-galaan. Annagoo la kaashanaya Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Federaalka Iswiiska waxaan bilaawnay hindise oo u horseeday saxiixa Dokumentiga Montreux sanadkii 2008dii. Taasina waxay si caddaan ah u xaqiijinaysaa waajibaadka sharciyeed ee saaran Dawladaha iyo shirkadaha noocas, waxayna qoraysaa sida ugu wacan ee xilliga colaadaha ay Dawladuhu ugu ol'olayn karaan ku-dhaqanka xeerka aadminnimada iyo midka xuquuqda aadanaha.

## Heshiisyo goboleed

Waxaan kaloo talo iyo taageero ka geysannaa qabyo-qorista heshiisyada waaweyn ee heer-goboleed, kuwaas oo ilaaliya dadka ay colaaddu saamayso. Tusaale ahaan, sannadkii 2009kii, Midowga Afrika wuxuu oggolaaday Heshiiskii Kambala. Wuxuu ahaa heshiis caalami ah kii ugu horreeyey oo weligeed ay qaarad idili isku mar saxiixdo, si loo dhawro barakacayaasha, loona gargaaro.

## Sharci-dejin maxalli ah

Annaga oo u marayna adeeggayaga la-tashiga ee ku saabsan xeerka caalamiga ah ee aadminnimada, waxaan Dawladaha ku dhiirri-gelinnaa inay xeer-dejin maxalli ah meel-mariyaan, si xeerka aadminnimadu uu gudaha dalalkooda uga fulo.

**Bambooyin aan qarxin oo yaaleen Laos ka hor inta si nabad ah khubarada furfurida bambooyinka aan u burburinin.**




Jim Holmes/ICRC

*"La-shaqaynta ICRCdu wuxuu ahaa mid aad noo caawiyey. Waxaan awood u yeelannay in aan isu geyno aqoonta ay miinooyoinka u leeyihiin iyo annagu kartida aan u lahayn Dawladaha xubnaha ah in aan meel isugu keenno. Tan iyo waqtigaas, waxaan, si wadajir ah, uga wada shaqaynaa arrimo badan oo kala duwan, gaar ahaan xeerka aadminnimada".*

El-Ghassim Wane, Agaasimaha Waaxda Nabadda iyo Amniga ee Ururka Midaynta Afrika ayaa yiri




Catalina Martin-Chico/Cosmos

Catalina Martin-Chico waa qofka ku guuleystay abaalmarinta sawir-qaadashada ugu horeeya ee ICRC Visa d'or Bani'aadanimada (Dabaadegga 23aad ee Sawir-qaadashada Caalamiga «Visa pour l'Image» -Setembar 2011- Perpignan, Faransiiska)

# DARYEELKA CAAFIMAADKA OO HALIS KU JIRA

Inta badan, colaadaha hubaysan waxa ugu daran ee ku waxyeelooba waa daryeelka caafimaadka sidii dadka u baahani ay nabadgelyadu ugu gaari lahaayeen. Dhawr sababood dartood, bukaanka iyo dhaawacu ma heli karaan la-tacaalidda ay baahida u qabaan: dagaalka awgiis, si xor ah uma socdaali karaan; aanbalaasyadii lagu qaadi lahaa ayaa isbaaro lagu xayiraa; meeshii lagu daweyn lahaa ayaa burbur gaaraa ama dhulka ayaa la dhigaa; shaqaalihii wax u qaban lahaana waa la dilaa ama inay cararaan ayaa lagu qasbaa. Weerarrada rugaha caafimaadka iyo shaqaalaha lagu qaado ayaa sannad kasta boqolaal qof ka hor-joogsada inay takhaatiir arkaan ama ay helaan tallaallada naf-bedbaadinta, taasina waxay ugu daran tahay dalalka markoodii horeba daryeelkooda caafimaadku uu iska liitey.

## Xaqqa loo leeyahay in daryeel caafimaad la bixiyo

Xeerka caalamiga ah ee aadminnimada iyo midka xuquuqda aadanaha ayaa ilaaliya bukaanka iyo dhaawaca iyo, weliba, kuwa iyaga daryeela. Nasiibdarro, inta badan ayaa qawaaniintaas la iska indho-tiraa. Sababtaas darteed, Dhaqdhaqaaqu wuxuu 2011kii ku tallaabsaday mashruuca ku magacaaban *Daryeelka Caafimaadka oo halis ku jira.* Ujeeddadiisu waxay ahayd in la hubiyo in si nabadgelyo ah ay daryeel caafimaad ku helaan dadka meelaha colaadda hubaysani ka jirto ku dhex-nool ama ay guuldarrooyin kale la soo kulmaan. Waxaa, sidoo kale, mashruuca looga jeedey in lagu horumariyo amniga shaqaalaha sida weyn isugu deyaaya inay adgeegyo caafimaad bixiyaan.

## Dhan la dhaafay ma jiro

Mashruucu wuxuu daboolaayey dhammaan dhinacyada hawlaheena ugu muhiimsan sida ilaalinta, gargaarka iyo ka-hortagga. Wuxuu lahaa wejiyo badan sida: cilmibaaris ku saabsan baaxadda iyo dabeecadda gacan-ka-hadalka; tallaabooyin dhab ah oo kor loogu qaadayo amniga shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo rugahooda; qoraallo marba la faafiyo oo dibedda lagu soo dhigaayo xad-gudubyada iyo hababka arxandarrada iyo ol'ole dadweynaha lagu wacyi-gelinaayo. Waxaan kaloo aad isugu hawlnay inaan xukuumadaha ku dhiirri-gelinno inay hagaajiyaan, isla markaas ay dhaqan-geliyaan xeerarka ilaaliya bukaan-jiifka iyo kuwa daryeelkooda u darban.

## Ka-wada-shaqaynta daryeel caafimaad oo ammaan ah

Si uu mashruucu guul ugu dhammaado, ICRCda iyo Ururada Maxalliga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas waxay la soo shaqeeyeen xukuumado badan iyo hay'ado caalami ah sida Qarammada Midoobey, Midowga Afrika iyo Hay'adda Caafimaadka Adduunka. Si loo soo saaro tallooyin lagu hubinaayo in daryeel caafimaad si nabadgelyo leh lagu heli karo meelaha ay colaadda hubaysani ka aloosan tahay, waxaan kaloo la hawl-galnay kooxo xirfad-yaqaanno ah sida Ururka Caalamiga ah ee Daaweynta, Golaha Caalamiga ah ee Kalkaaliyeyaasha iyo Guddiga Caalamiga ah ee Daweynta Ciidammada.

**Si aad dheeraad uga ogaato mashruuca Daryeelka caafimaadka oo halis ku jira, arag www.icrc.org/discover**



Catalina Martin-Chico/Cosmos

Waxaan farriimaheena ka faafinnaa siyaabo badan ay ku jiraan live RSS feed-ka, Twitter-ka, bogga Facebook-ga iyo website-ka (www.icrc.org). Waxaan kaloo la shaqeyna ururada wararka si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan walaacyada bani'aadamnimada iyo in kor loo qaado ammaanka suxufiyiinta ka hawlgala goobaha dagaalka ama meelaha kale ee rabsho ka jirto.

Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg www.icrc.org/discover

# OGAALKA MUSTAQBALKA

## Teknoloojiyad isbaddaleysa, qalab iyo caqabado

Teknoloojiyadu waxay saamaysaa dhinacyada nolosha oo idil, colaadduna waa ka mid. Tusaale ahaan, tobankii sano ee ugu dambeeyay, dunidu waxay u soo joogtey adeegsiga dayuuradaha meelaha fogfog laga hago. Si ballaaran haddii loo dhigo, xukuumadaha iyo kuwa hubka farsameeyaaba waxay samaynayaan hub iswada ama iskooda u shaqeeya iyo, weliba, horumarinta awoodaha dagaalka internetka (cyber warfare).

Maadaama teknoloojiyadu ay bedeshay hababka dagaalka waxaa loo baahan yahay xeerka caalamiga ahina inuu la jaan-qaado. Waxaa qasab ah in si caddaan ah loo qeexo xeerarka iyo axdiyada jiraa sida loogu dabbaqi karo teknoloojiyada cusub. Iyada oo yoolalkaas tiigsaneysa, ICRCdu waxay indhaha ku haysaa horumarinta hubka cusub, Dawladahana wada-xaajood joogto ah ayay arrintaan kala yeelataa.


## Fursado cusub

Isbaddelka teknoloojiyadu wuxuu leeyahay siyaalo kale oo uu wax u saameeyo. Telefoonnada xarfaanta ah, kombiyuutarrada dhabta iyo shabakadaha isgaarsiinta ee la horumariyey waxaa looga baxsan karaa habab cusub oo dhibaatooyinka culculus lagaga jawaabi karo. Tusaale ahaan, maababka raqmiga qalalaasaha markaas dhaca (digital cris maps) waxay oggol yihiin wararka muhiimka ah in la isugu gudbiyo internetka ama shabakadaha telefoonnada gacanta. Waxay kaloo ICRCdu leedahay hannaan cusub oo wararka muhiimka ah dadka u baahan si toos ah loogu diro. Iyaga oo hannaankaan adeegsanaaya, dhibbaneyaasha colaadduna waxay awoodi karaan baahiyaha ay qabaan in si toos ah oo qeexan ay u sheegtaan. Taasina waxay noo oggolaanaysaa si wax-ku-ool ah inaan u abbaarno gargaarkeena, isla markaasna dhinacyada wada-shaqayntu naga dhexayso iyo annagu aan si wacan wax u wada qorshayno.

## Wax-hagaajin joogto ah

Weligeedba isma dhimin heellanaanta aan u qabno saxariirta colaadda inaan dadka ka yasirno. Si le'eg sidii ay u adkayd 150 sano muddo laga joogo oo ah markii nala asaasay ayay heellanaantaasi maantana u adag tahay. Sidaas baan ku wadi doonnaa, annaga oo waayo aragnimadeena ku cuskanayno, si aan u gargaarno dadka sida aadka ah baahida ugu qaba in ay ku noolaadaan nolol caafimaad leh, waxsoosaar leh, sharafna leh.

**Si aad ICRCda waxyaabo dheeraad ah uga barato, fadlan booqo www.icrc.org/discover**




**KHARIIDADDA BAADHITAANKA BIYAHA - Woreda Ahferom, Ethiopia, December 2011**

Xafiiska Kheyraadka Biyaha ee Tigray wuxuu ku go'aansaday in tuulo kasto ay lahaato il biyo ah oo san ka fogayn 1.5km.

Khariidadda kor ku xusan waxaa soo saaray Xafiiska Kheyraadka ee Tigray ka dib ay sameeyeen liiska ilaha biyaha gobolka Woreda Ahferom 2011kii.

Khariidada waxay tusaysaa tuulooyinka ee ilaha biyaha ka fogeyn 1.5 km iyo kuwa aan lahayn il biyo, markaasna waxay tusaysaa meelaha looga baahan yahay in ilaha la diyaactiro ama laga sameeyo.

**Deegaannada iyo tuulooyinka**

- Waxay biyo ka helaan goobaha biyaha shaqeeya ee u jira 1.5 km
- Waxay biyo ka helaan goobaha biyaha oo qayb ahaan u shaqeeya ee u jira 1.5 km - *U baahan dayactir*
- Waxay biyo ka helaan goobaha biyaha oo jaban ee u jira 1.5 km- *dayactir deg deg ah u baahan.*
- Ma laha goob biyo laga helo oo u jira 1.5 km- *goobo biyo oo dheeraad ah ayaa loo baahan yahay*

**Bam-gacmeedyo**

- Shaqeynayo
- Jaban

**Isha xogaha:**
Deegaanka: OSM, Gazetteer
Webiyo: ICRC
Goobaha laga helo biyaha: ICRC iyo Xafiiska Kheyraadka Biyaha ee Tigray
Basemap: SRTM Shaded Relief

0 2 Km

Waxaa soo diyaariyey OP_ASSIST_EH
EHG1382-ET-Water-Access-AHFERON

ICRC

**Khariiradaan digital-ka ah oo ay soo saareen Xafiiska Kheyraadka Biyaha ee Tigray, Itoobiya iyo ICRC wuxuu guddiga biyaha deegaanka awood u siinaya in xog ka helaan xaalada ceelasha iyo ilaha biyaha. Ka dibna waxay raadraaci karaan helitaanka biyo ee dadka ku nool tuulooyinka iyo haddii ceelasha ay u baahanyihiin in la qodo ama la dayactiro.**

**WAAJIBAADKEEDA SHAQO**

Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Cas (ICRC) waa hay'ad eexasho la'aan, dhexdhexaad oo madax bannaan ah, waajibaadkeedana keliya waa in ay dhowrto nolosha iyo sharafta dhibbanayaasha colaadaha hubaysan iyo xaalado kale ee qalalaase ah iyo inay siiso gargaar biniaadminimo leh. ICRCdu waxay kaloo ku dadaashaa inay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarinayso islamarkaana xoojinaysa xeerka aadminimada iyo mabaadi'ida caalamiga ah ee aadminimada.


**Xafiiska ICRC Muqdisho**
Degmada Wadajir
Xaafadda Buulo-xuubey
Muqdisho, Soomaaliya
mog_mogadiscio@icrc.org

**Xafiiska ICRC Kismaayo**
Faanoole isgoyska Qacle
Ka soo horjeedka dhismaha Sadaam 2
Kismaayo, Soomaliya
kis_kismayo@icrc.org

**Xafiiska ICRC Baydhabo**
Dhabarka dambe siinka Somaphone
Wadada Muqdisho-Baydhabo
Baydhabo, Soomaliya
bad_baidoa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Dhusamareeb**
Dhusamareb town
Kadiye road off Dayax section
Galmudug, Soomaaliya
dhu_dhusamareb@icrc.org

**Xafiiska ICRC Hargeisa**
Ka soo horjeedka suuqa Cosob
Degmada Jig Jiga Yer
Hargeisa, Somaliland
hag_hargeisa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Garoowe**
Halgan/qeybta A Lambar guri 0185
Wadada Jimcaale
Garoowe, Puntland
Soomaliya
gar_garowe@icrc.org

**Xafiiska ICRC Jowhar**
Wadada airport-ka
Xaafda Hantiwadaag
Laanta labaad ee Baryare
Jowhar, Soomaliya
jow_jowhar@icrc.org

**Xafiiska ICRC Nayroobi**
Waddada Ngecha Kabete Hoose
S.B 73226-00200
Nayroobi
SOK-Nairobi@icrc.org

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_somalia
blogs.icrc.org/Somalia


ICRC

www.icrc.org
© ICRC, May 2025

0790/402 08.2018 1500

Sawirka bogga hore: Jonathan Torgovnik/Getty Images/ICRC